JAMHUURIYADDA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE

ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند

| | | |
|---|---|---|
| *Sannadka 7aad* | *Cadad Gaar ah* | *01/09/2018* |

## DHAQAN-GALKA XEERKA SHIRKADAHA SOMALILAND
## XEER LR.80/2018

**Email: garyaqaankaguud@gmail.com**
**Web.www.garyaqaankaguud.com**

*Lama iibin karo*
*Not for sale*

*Sannadka 2018*

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-188/082018 Taar: 25/08/2018

## Wareegto Madaxweyne

**<u>Dhaqan-galka Xeerka Shikadaha Somaliland</u>**
**<u>Xeer Lr. 80/2018</u>**

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Go'aanka Golaha Wakiillada Go'aan Lr.GW/KF-37/803/2018, summadiisuna tahay Ref: GW/9/26/166/2018, kuna taariikheysan 05/08/2018, ujeedadiisuna tahay soo gudbin go'aanka ansixinta Xeerka Shirkadaha Somaliland, Xeer Lr. 80/2018;

Markaan Arkay: Qodobada 75aad, 76aad, ee Datuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

<u>Waxaan soo-saaray;</u>

Wareegtadan oo lagu baahinayo Dhaqan-galka Xeerka Shirkadaha Somaliland, Xeer Lr. 80/2018.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**Ujeedo: Go'aanka Ansixinta Xeerka Shirkadaha Somaliland**
**Xeer Lr.80/2018**

**MARKUU ARKAY** Qodobada 38aad, 77aad, 78aad ee Dastuurka Qaranka Jamhuuriyada Somaliland.

**MARKUU ARKAY** Qodobada 11aad iyo 12aad, ee Dastuurka Qaranka Jamhuuriyada Somaliland.

**MARKUU GARAWSADAY** In dhaqaale xoogan oo fir-fircoon oo ay yeelato qaybta gaarka loo leeyahay (private sector) ee Somaliland uu u yahay faa'ido dadka Jamhuuriyadda Somaliland; islamarkaana koritaanka qaybta gaarka loo leeyahay ay horumarayso marka ay badhitaarayaan hanaan sharci iyo nidaamin casri ah oo soo dheegta dhaqamada ugu wanaagsan ee caalamiga ah si loogu fudaydiyo ganacsiga ganacsatada bilawga ah iyo dhamaan ganacsiga oo dhan xajmigiisa iyo ujeedadiisu intay doonaan ha leekaadeene.

**MARKUU GARWAAQSDAY** In hanaankaas sharci ay astaamihiisu yihiin habraacyo iyo halbeegyo fudud oo cad, habab si wanaagsan u shaqeeya, fudayd, daah-furnaan iyo yaraynta caqabaha ay keenaan nidaaminta iyo maamul-xafiiseedku (bureaucratic).

**MARKUU KU QANCAY** Inay daruuri tahay in hanaanka sharci ee hada jiraa oo ay xadidan tahay inta uu gaadhsiisan yahay islamarkaana ay caqabad ku tahay oo aanu lahayn is-raacsanaan iyo fulin uu u baahan yahay dib u habayn si loogu balaadhiyo waxyaabaha ay kala xulan karaan ganacsatada bilawga ah. ee

doonaya inay bilaabaan ganacsi iyada oo la siinayo habab ka duwan kuwa ku jira sharciga hada jira si loogu guulayasto maamul dawladeed horumarsan oo waxtar leh iyada oo la aasaasayo xarunta elektorooni ah ee fududaynta ganacsiga (One-Stop Business Facilitation Center); si loo dhiirigeliyo habaynta ganacsiga gaarka loo leeyahay iyada oo loo hirgelinayo habraac diiwangelin iyo helidda xogta oo hufan oo ku salaysan habka interneetka oo degdeg ah (fast online) is loo xaqiijiyo in qiimaha lagu bilaabo ganacsiga uu noqdo mid jaban, iyo waafaqidda iyo ilaalinta is-bedelka nolosha. .

**MARKUU U ARKAY:-** Go'aanka Ansixinta Xeer **LR:80/2018** ee Golaha Wakiiladu U Gudbiyeen Golaha Guurtida JSL Kuna taariikhaysnaad **20/12/2017**

**MARKUU ARKEY:-** Go'aanka Ansixinta Xeer **LR:80/2018** ee Golaha Guurtida JSL kuna Taariikhaysnaa **23/04/2018**

**MARKUU ARKAY:-** In Golaha Guurtida wax-ka-bedel iyo kaabis ku samayeen kuna ansixiyeen sideed iyo sodon **(38)** cod **Xeerka Shirkadaha Somaliland .**

# WUXUU

Cod aqlabiyad ah oo soddon iyo kaw **(31 cod)** mudane oo gacan taag ah ku Ansixiyay **Xeerka Shirkadaha Somaliland (Xeer Lr. 80/2017)**.

**ALLAA MAHAD LEH**

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL

Baashe Maxamed Faarax
GuddoomiyahaeeGolahaWakiilada JSL.

GOLAHA WAKIILADA JAMHUURIYADA SOMALILAND

## GOLAHA WAKIILADU

**Markuu Arkay:** Qodobada 11aad iyo 12aad, ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

**Markuu garawsaday:** In dhaqaale xoogan oo fir-fircoon oo ay yeelato qaybta gaarka loo leeyahay (private sector) ee Somaliland uu u yahay faa’ido dadka Jamhuuriyadda Somaliland; islamarkaana koritaanka qaybta gaarka loo leeyahay ay horumarayso marka ay badhitaarayaan hanaan sharci iyo nidaamin casri ah oo soo dheegta dhaqamada ugu wanaagsan ee caalamiga ah si loogu fudaydiyo ganacsiga ganacsatada bilawga ah iyo dhamaan ganacsiga oo dhan xajmigiisa iyo ujeedadiisu intay doonaan ha leekaadeene

**Markuu garwaaqsaday: -** In hanaankaas sharci ay astaamihiisu yihiin habraacyo iyo halbeegyo fudud oo cad, habab si wanaagsan u shaqeeya fudayd, daah-furnaan iyo yarraynta caqabaha ay keenaan nidaaminta iyo maamul-xafiiseedku (bureaucratic)

**Markuu ku qancay:** Inay daruuri tahay in hanaanka sharci ee hada jiraa oo ay xadidan tahay inta uu gaadhsiisan yahay islamarkaana ay caqabad ku tahay oo aanu lahayn is-raacsanaan iyo fulin uu u baahan yahay dib u habayn si loogu balaadhiyo waxyaabaha ay kala xulan karaan ganacsatada bilawga ah ee doonaya

inay bilaabaan ganacsi iyada oo la siinayo habab ka duwan kuwa ku jira sharciga hada jira si loogu guulayasto maamul dawladeed horumarsan oo waxtar leh iyada oo la aasaasayo xarunta elektorooni ah ee fududaynta ganacsiga (One-Stop Business Facilitation Center); si loo dhiirigeliyo habaynta ganacsiga gaarka loo leeyahay iyada oo loo hirgelinayo habraac diiwangelin iyo helidda xogta oo hufan oo ku salaysan habka interneetka oo degdeg ah (fast online) is loo xaqiijiyo in qiimaha lagu bilaabo ganacsiga uu noqdo mid jaban, iyo waafaqidda iyo ilaalinta is-bedelka nolosha.

**Marku aqoonsaday: -**

in hal qof uu u aasaasi karo shirkad si ay u qabato ujeedo kasta oo sharci ah, ha noqoto mid faa'iido laga doonayo ama mid aan faa'ido laga doonayn, shirkadaas oo leh jiritaan qaanuuni ah

- Xadidaya masuuliyadda (liability) mulkiilayaasha iyo maamulayaasha shirkadda
- Ogolaanaya in shirkadi yeelan karto Saamile keliya ama in ka badan
- Aasaasaya in mabda' xoriyadda heshiisku uu mudnaanta leedahay saamilayda shirkadda dhexdooda marka ay samaynayaan shuruucda maamul ee shirkadooda iyo xadidida xidhiidhka ka dhexeeya shirkadda iyo Saamilaydeeda;
- Ogolanaya in si xor ah loo gudbin karo danaha (free transferability of interests);

- Bixinaya fudayd (flexibility) arimaha la xidhiidha u qoondaynta hawl agaasimayaasha, saraakiisha, maamulayaasha iyo wakiilada;
- Dejinaya shuruuc ku filan oo lagu hagi karo qaladaadka marka aanay jirin qodobo heshiis;
- Daboolaya ilaalinta maalgashadayaasha, danaha saamilayda laga badan yahay (minority rights), daynalyaasha iyo maamulayaasha (administrators);
- U dhigaya hagitaan cad maamulka shirkadaha
- Kobcinaya daah-furnaanta iyada oo laga fogaanayo in la siiyo maamulayaasha awood ikhtiyaari ah iyo kuwo taabanaya xuquuqaadka (quasi-judicial duties)
- Baabinaya nidaamka culayska badan ee qaaliga ah sida hanaanka is-diiwaangelinta ee ay ka mid yihiin qoraalada nootayooyinka, raasamaalka u yar ee shirkad lagu samayn karo, shaambadda shirkadda, xisaabaadka sanadlaha ah iyo warbixinada agaasimayaasha;
- Hoos u dhigaya waajibaadka kormeer iyo qarashka maamulayaasha islamarkaana sheegaya in doorka maamul uu yahay mid xadidan oo heer wasaaradeed ah
- Jideynaya in khidmadda la qaadaya ay noqoto mid ku salaysan qarashaadka maamul

oo u dhigma adeegga la bixinayo;

- Keensanaya hab casri ah oo elektorooni ah islamarkaana waxtar leh si loo bixiyo adeegyo ganacsi oo tayo sare leh oo midaysan (integrated) iyo gudashada waajibaadka dawladeeed ee dhinacyada badan leh kuwaas oo ay ku jiraan u oglaanshaha in shirkadi isticmaasho tilmaame u gaar ah (unique identifier) dhamaan xidhiidhkeeda ay la leedahay dawladda, is-tilmamidda (self-classification) shirkadda ee hawleheeda ganacsi, foom (form) la fudaydiyay oo isku mid ah (standardized), fudaydinta shuruudaha magaca shirkadda, warbixin sanadeed si loo xaqiijiyo xogta lagu kaydiyo kaydshaha dhexe ee elektorooniga ah (central electronic database), baabinta in looga baahan yahay saxeex saamilayda shirkadda iyo keenida hab kale si loo fuliyo shuruudaha dhigan iyo talaabooyinka laga qaadayo cidii raaci wayda shuruudahaas.

- Casriyaynaya hanaanka sharci iyo nidaamin ee Shirkadaha ganacsi isaga oo laalaya Xeerka Shirkadaha, Xeer Lr. 25/2004 iyo dhamaan xeer kasta oo kale oo shirkadeed isaga oo shardi ka dhigaya in dhamaan shirkadaha, wadani iyo ajnabi ba, loo sameeyey ama loo diiwaangeliyay si waafaqsan

Xeerkii Shirkadaha, Xeer Lr. 25/2004 ama xeer kale oo shirkadeed oo ay Somaliland lahayd islamarkaana jira marka uu dhaqangalo xeerkani waxa laga soo qaadayaa inuu maamulayo oo ay hoos imanayaan xeerkan loogana baahan yahay inay isu diiwaangeliyaan si waafaqsan xeerkan hanaan uu dejiyay Diiwan-hayuhu, islamarkaana wuxuu Xeerkani is-waafajinaya shuruucda kale iyo xeer-nidaamiyaasha jira wuxuu Xeerkani is-waafajinaya shuruucda kale iyo xeer-nidaamiyaasha jira

Wuxuu Ansixiyay

**Xeerka Shirkadaha Somaliland**
**Xeer Lr. 80/2017**

## CUTUBKA 1
## CINWAANKA
## QEEXITAANO, TURJUMAADO, DABBAQAADDA IYO QODOBO GAAR AH

### Qodobka1aad
### Eray Bixin

Hadii aan si ka duwan loogu qeexin farqad, qodob ama cutub ka mid ah xeerkan ama aan si kale nuxurku tilmaamin, ereyadan iyo weedhahan waxa loola jeedaa:

**Cinwaan:** waxa loola jeedaa cinwaanka waraaqaha lagu diro (mailing address) ama cinwaanka sekedda (street address) gobtu ku taalo
**Magac shirkadeed la qaatay**: waxa loola jeedaa magac uu qaatay Shirkad shisheeye si waafaqsan qodobka 20
**Ganacsi**: waxa loola jeedaa hawl kasta oo sharci ah oo ay ku jirto yeelashada hanti ha noqoto hawshaasi mid faa'iido laga dheefo ama midaan laga dheefin
**Shirkad:** waxa loola jeedaa shirkad loo aasaasay si waafaqsan sharcigan ama shirkadhore ujirtay
**Xeerka Shirkadaha:** waxa loola jeedaa XEERKA SHIRKADAHA EE SOMALILAND (XEER LR. 80/2017
**Magac shirkadeed:** waxa loola jeedaa magaca shirkadda ee lagu tilmaamay qoraalka aasaaska shirkadda ama qoraalka aasaaska wax kabadalka loogu sameeyey si waafaqsan qodobka17 ama qodobka 18
**Xeerka shirkadda;** waxa loola jeedaa qoraalka loo diiwaangeliyay shirkadda ama xeer hoosaadka shirkadda.
"**Shirkadaha isku biiraya:** waxa loola jeedaa mid kasta oo ka mid ah Shirkadaha wax ku biiraya iyo shirkada soo hadhaya
**Qoraalka shirkadda ee la diiwaangeliyay:** waxa loola jeedaa qoraalka diiwaangelinta shirkad jirtay ama qoraalka aasaaska shirkadda ama qoraal kale oo la mid ah oo ay diiwaangelisay ama loo diiwaangeliyay Shirkad si waafaqsan sharciga dalka shirkada lagu aasaasay, loo aasaasay ama shirkadu ka helay jiritaankiisa

Shirkadnimoama shirkada ama mulkiilayaashiisu ka helaan sifada masuuliyadda xadidan (limited liability). Marka qoraalka la diiwaangeliyay wax laga bedelay ama dib loo qoray, qoraalka la diiwaangeliyay waxa loola jeedaa wax ka beddelka ama dib u qorista u danbaysay

**Diwaan haye:** waxa loola jeeda Xafiiska Xeer-ilaalinta Guud ee Qaranka

**Isku-darsi (Contribution):** waaxa loola jeedaa wax kasta oo qiime leh oo qof ku darsado shirkad si uu uga noqdo Saamile shirkadda, ama isaga oo ka ah Saamile shirkadda, waxaas uu ku darsanayo oo ay ku jiraan ku jiraan lacag, hanti ama adeeg la bixiyay ama qoraalka balan qaadka (promissory note) ama waajibaad kasta oo kale oo qabanaya si ugu darsado lacag, hanti ama gudashada adeeg.

**Maxkamad:** waxa ku jira maxkamad kasta iyo garsoore kasta oo ikhtisaas u leh dacwad

**Shirkad tahli-waa ah (Delinquent entity):** waxa loola jeedaa iyada oo laga duulayo qodobka 73inuu yahey mid awoodi Karri waayay.

**Gaadhsiin:** waxa loola jeedaa ku gaadhsiin habka lagu diro waraaqaha (mail); marka laga reebo in marka qoraalka la gaadhsiinayo Diiwaanhayaha ay waajib tahay in si toos ah loogu gacan geliyo diwaan-hayaha. Marka diiwaan-hayuhu isagu gaadhsiinayo qoraal qof, waxa ka mid ah in toos loogu gacan geliyo qofka ama loogu diro waraaq ahaan cinwaanka xafiiska guud ee qofka. Marka diiwaan-hayuhu gaadhsiinayo qoraal qof aan lahayn cinwaan xafiis guud, waxa ku jira in lagu gaadhsiiyo cinwaanka kale ee qofkaasi siiyay diiwaan-hayaha.

**Shirkad wadani ah (domestic entity):** waxa loola jeedaa shirkad, urur ama isu-taga (association) lagu aasaasay xeer dhaqangal ka ah Somaliland ama sharciga Somaliland uu maamulo xidhiidhka ka dhexeeya mulkiilayaasha dhexdooda iyo mulkiilayaasha iyo ururka ama isu-tagga uuna u aqoonsan yahay sharciga Somaliland Shirkad sharci oo gaar ah

**Taariikhda dhaqangalka (effective date):** marka laga hadlayo qoraal uu diiwaangeliyay diwaan-hayuhu, waxa loola jeedaa waqtiga iyo taariikhda loo go'aamiyay si waafaqsan qodobka 87

**Taariikhda dhaqanglka ah ee kala diridda shirkadda:** waxa loola jeedaa taariikhda dhaqanlgalka qoraalka kala diridda shirkadda ama taariikhda ku dhigan diiwaanada Diiwaanhayaha ee garsoorku shirkadda kala diray ama iskeed u kala dirantay kadib markii uu dhacay mudadii jiritaankeedu.

**Shirkad (entity):** waxa loola jeedaa Shirkad wadani ah ama Shirkad shisheeye ah.

**Shirkad jirta:** waxa loola jeedaa shirkad lagu aasaasay Xeerka Shirkadaha (2004) ama xeer kale oo shirkadeed oo Somaliland leedahay islamarkaana jirta marka uu dhaqangalo xeekani

**Shirkad shisheeye oo jira:** waxa loola jeedaa Shirkad shisheeye oo loo ogolaaday inuu ka qabto ganacsi ama ka fuliyo hawl gudaha Jamhuuriyadda Somaliland si waafaqsan diiwaangelinta qoraalada iyada oo loo raacay sharci ka jira Jamhuuriyadda Somaliland shirkadaasoo dhaqangal ahaa ka hor dhaqangalka xeerkan islamarkaana jiray kana qabanayay ganacsi ama ka fulinayay hawl gudaha Somaliland waqtiga uu dhaqangalay xeerkani

**Khidmad:** waxa loola jeedaa khidmad uu cayimay uuna qaado diiwaan-hayuhu sida ku cad qodobka 86 waxana ku jira khidmadaha loogu soo rogo ganaax ahaan dib u dhac diiwaangelin ama sabab kale

**Qoraal la diiwaangeliyay:** waxa loola jeedaa qoraal uu qabtay Diiwaanhayahu si waafaqsan Xeerkan, ha noqdo qoraalkaasi mid dhaqan gal ama midaan dhaqangelin

**Shirkad shisheeye:** waxa loola jeedaa shirkad, urur ama isu-tag loo aasasay si waafaqsan sharciga dal kale oo aan ahayn Somaliland ama sharciga dal kale oo aan Somaliland ahayni uu maamulo xidhidhka ka dhexeeya mulkiilayaasha dhexdooda ama mulkiilayaasha iyo ururka ama isu-tagga uuna u aqoonsan yahay sharciga dalkaasi Shirkad sharci oo gaar ah

**Magaca Shirkad shisheeye:** waxa loola jeedaa:
(a) Magaca Shirkad shisheeye oo loo ogolaaday inuu ka qabto ganacsi ama ka fuliyo hawl gudaha Jamhuuriyadda Somaliland, ha noqdo magacaasi mid sax ah ama magac Shirkadeedneed la qaatay, magacaas oo loo bedeli karo si waafaqsan qodobka 20; ama
(b) Shirkada shisheeye ee aan loo ogolaan inuu ka qabto ganacsi ama ka fuliyo hawl gudaha Jamhuuriyadda Somaliland, magaciisa saxda ah

**La aasaasay(formed)**: isticmaalka ereygan waxa ku jira "shirkad laga dhigay (incorporated)", "la abuuray", "la abaabulay", mid kasta oo ka mid ah ereyadasina waxay u dhigmaan ta kale. Marka ay la xidhiidho Shirkad ugu horayntii lagu aasaaay ikhtisaaska dal, kadib marka ay Shirkad isku biireen ama ay degto dal kale, ama sabab kaleba, uu u aqoonsado sharciga dalka markii hore lagu aasaasay in laga aasaasay ikhtisaaska sharciga dalka kale, Shirkadeednkaa waxa laga soo qaadaya xeerkan gudihiisa in lagu aasaaay ikhtisaaska sharciga dalka danbe

**Waxa ku jira ama ereyada ku dhow:** marka lagu isticmaalo qeexid ama tax (list), waxay tilmamaysaa in qeexidda ama tixiddu uu yahay qayb oo aanu dhamaystirnayn
**Ikhtisaas:** waxa ku jira Jamhuuriyadda Somaliland, dal shisheeye ama maamul dawladeed oo shisheeye ah, wakaalad, qayb ka mid ah ama qayb ka farcanta dawladaas

**Habka waraaq diridda:** waxa loola jeedaa ku diridda waraaqo hanaanka boostada ama hab kale oo waraaqaha lagu diro kaas oo si haboon loogu socod siiyay cidda loo dirayo

**Cinwaanka waraaq diridda:** waxa loola jeedaa marka laga hadlayo qof, goobta uu joogo ama lagu gaadhsiinayo waraaqaha qofkaas, goobtaas oo lagu qeexayo magaca sekedda iyo lambarka ama lambarka sanduuqa boosto, magaalada iyo (hadii aanay ahayn meeshu Somaliland) dalka, iyo furaha boosto (postal code) hadii uu jiro si loo gaadhsiiyo qoraalka goobta uu ku socdo. Hadii aanu qofku lahayn sanduuq boosto, sabab reer guuraanimo ama sabab kale awgeed, islamarkaana aanay jirin magac sekedeed iyo lambar, iyo magaalo tooni, cinwaanka waraaq diridda waxa loola jeeda qeexid sida ugu macquulsan ee ugu cad u tilmaamaysa goobta uu joogo qofka loo dirayo waraaqaha

**Maareeye:** waxa loola jeedaa:
(a) Saamile ka tirsan shirkad ay maamulkeeda leeyihiin Saamilayaashu
(b) maareeye marka maamulka shirkadda ay leeyihiin maareeyeyaal balse aanay gacanta ugu jirin saamilayaasha
(c) qof loo xilsaaray inuu noqdoo maareeye shirkad si uu u maamulo shirkadda si waafaqsan qodobka 37
(d) qof xilka uu ka hayo shirkadu sida ku dhigan xeerka shirkadda ama sharcigu uu yahay mid u dhigma shaqo ahaan xilalka ku dhigan xubnaha(a) ilaa (c) ee farqadan **Waxa loola jeedaa:** waxay tilmaamaysaa qeexid ama tax dhamaystiran

**Saamile:** waxa loola jeeda qof ku leh dan lahaansho (ownership interest) shirkad oo leh xuquuqaadka iyo waajibaadka ku dhigan Xeerkan. Marka shirkadu leedahay hal Saamile keliya, ereyga Saamile ama saamilayaal waxa loo qaadanaya Saamilahaas keliya

**dan Saamile (membership interest):** waxa looga jeedaa saamiga Saamile ee faa'iidada iyo khasaaraha shirkadda

iyo xaqa inuu helo qaybtiisa marka la qaybinayo hantida shirkadda

**Shirkadahawax ku biiraya (merging entity):** waxa looga jeedaa Shirkad ku biiraya shirkada soo hadhaya si waafaqsan qodobka 43 ama si waafaqsan xeerka aasasiga ah ee shirkadda

**Waajib:** waxa loola jeedaa dayn, waajib, masuuliyad, ha ka dhalato gashi (tort) heshiis ama si kale

K**u jira diwaanada Diiwaanhayaha:** odhaahdan marka laga hadlayo qoraal waxa loola jeedaa in qoraalkaas uu qabtay Diiwaanhayaha uuna u dhaqangalay si waafaqsan qodobka 88 ama uu waafaqsan yahay sharciga islamarkaana kadib marka ay bilaabantay dhaqangalka qoraalka aanu jirin talaabo kale oo laga qaaday ama wax laga saaray oo ka dhigaya qoraalka mid aan dhaqangal ahayn ama la laalay dhaqangalkiisa

S**harci:** waxa loola jeedaa, marka ay la xidhiidho Shirkad:

(a) Xeerkan
(b) Sharciga lagu aasaasay shirkadaasha noqdo mid soomaliland ledahay ama dal kale
(c) Shuruucda kale ee Somaliland ama dalalka kale ee maamula qaab-dhismeedka iyo maamulka gudaha Shirkadaaskaas

**Mulkiile:** waxa loola jeedaa Saamile ama qof ku leh dan u dhiganta dan mulkiile Shirkad

**dan mulkiile:** waxa loola jeedaa danta Saamile ee lagu leeyahay shirkad

**Qof** waxa loola jeedaa qof dabicii ah, Shirkad, iyo wax kasta oo leh shaqsiyad qaanuuni ah

**Cinwaanka guud (principal address):** waxa loole jeedaa cinwaanka xafiiska guud ama hadii aanu qofkulahayn cinwaanka xafiis guud, cinwaanka sekedda qofku ku leeyahay ganacsiga ee Somaliland gudeheeda hadii uu yahay mid qudha, hadii aanu qofku ku laayn goob ganacsi Somaliland gudaheeda,cinwaanka sekeda qofku ka dagan yahay gudaha JSL hadii uu yahay mid qudha, hadii aanu qofku u lahayn goob ganacsi ama daganaansho gudaha Somaliland, cinwaanka sekeda

goobta ganacsi ee dabada Somaliland haduu leeyahay mid qudha,

(b) Xaalad kasta oo lagu sheegay farqadda sare, qof aan lahayn cinwaan xafiis guud, cinwaan guud waxa loola jeedaa cinwanka waraaqaha lagu diro ee qofka hadii uu ka duwan yahay cinwaanada ku xusan farqadda sare

**Xafiiska Guud (principal office):** waxa loola jeedaa xafiiska shirkada ee ku yaal cinwaanka xafiiska guud ee shirkada

**Cinwaanka Xafiiska Guud:** waxa loola jeedaa cinwaanka sekedda iyo hadii uu ka duwan yahay ciwnaanka waraaqaha lagu diro ee gudaha ama debedda Somaliland ee shirkadu ku tilmaantay qoraalkii ay markii u horaysay soo gudbisay inuu u yahay cinwaanka guud ee xafiiska Shirkada ka, foom ama waraaq kale oo isticmaalkeeda uu waajibiyay Diiwaanhayaha si shirkadu ugu sheego cinwaanka xafiiska guud ama hadii cinwaanka xafiiska guud ee loo bedelay si waafaqsan qodobka 91, cinwaankii u danbeeyey ee shirkadu u guuray

**Dhegaysi:** waxa loola jeedaa dacwad madani ah, garqaadis (arbitration), dhexdhexaadin, dacwad ciqaab ah, talaabooyin maamul ama baadhitaan

**Helid:** marka ay la xidhiidho helida qoraal uu helay Shirkad, waxa loola jeedaa in loo gacan geliyay shirkada qoraalkaas

**Warbixin ama warbixin sanadeed:** waxa loola jeedaa warbixinta uu shardiyay qodobka 72

**Shirkad war-bixinaysa:** waxa loola jeedaa Shirkad kasta oo wadani ah kaas oo sharcigiisu uu ku jiro diiwaanada Diiwaanhayaha iyo Shirkad kasta oo shisheeye oo loo ogolaaday inuu ka qabto ganacsi ama ka fuliyo hawl gudaha Jamhuuriyadda Somaliland. Shirkad wuxuu noqdaa mid aan warbixinayn marka lakala diro, uu noqdo tahli-waa ama marka uu iska dhiibo ogolaanshaha uu u haystay inuu ka qabto ganacsi ama ka fuliyo hawl gudaha Jamhuuriyadda Somaliland, hadba kay tahay.

Shirkada lakala diray ee ahaa Shirkad warbixinaya ka hor kala diridda, wuxuu mar kale noqdaa mid warbixinaya marka dib loo soo celiyo si waafaqsan cutubka 11 ee Xeerkan, Shirkad tahli-waa ahina wuxuu mar kale noqdaa shirkad warbixinay marka laga daweeyo tahli-waa si waafaqasan qodobka 76

**Jamhuuriyadda Somaliland:** waxa ku jira degmo kasta, maamul, xafiis gudi, waax iyo hay'ad kasta oo kale oo ka tirsan Jamhuuriyadda Somaliland ah

**Qoraalka wax-ka-bedelka:** waxa loola jeedaa qoraalka wax ka bedelka ee ku tilmaaman qodobka 90

**Qoraalka sixitaanka;** waxa loola jeedaa qoraalka sixitaanka ee ku tilmaaman qodobka qodobka 89

**Qoraalka ogolaansho siinta Shirkad shisheeye oo jira:** waxa loola jeedaa qoraal ogolaansho siinaya Shirkad shisheeye oo jira sida ku cad qodobka 117.

**Qoraalka ogolaansho siinta Shirkad shisheeye:** waxa loola jeedaa qoraalka ogolaanshaha siinaya Shirkad shisheeye sida ku cad qodobka 102

**Qoraalka aasaaska (Statement of formation):** waxa loola jeedaa qoraalka aasaaska ee ujeedadiisu tahay in lagu aasaaso shirkad sida ku cad qodobka 12, qoraalkaas oo ku jira diiwaanka diiwaan-hayaha. Qoraalka aasaaska waxa ku jira wax ka bedelka lagu sameeyey qoraalka aasaaska, qoraalka aasaaska dib loo qoray, qoraalka isku biiridda (statements of merger) iyo qoraalada kale si kasta oo loo dhigo ee lagu kaydshay diiwaanka Diiwaanhayaha kuwaas oo wax ka bedelaya ama kaabaya qoraalka aasaaska asalka ah ama wax laga bedelay

**Qoraalka isku biiridda (Statement of merger):** waxa loola jeedaa qoraalka isku biiridda ee lagu tilmaamay qodobka 54

**Qoraalka diiwaangelinta shirkad jirta:** waxa loola jeedaa qoraalka diiwaangelinta shirkad jirta ee la geliyay diiwaanada Diiwaanhayaha iyada oo ujeedadu tahay in la diiwaangeliyo shirkad jirta, Qoraalka diiwaangelinta shirkad jirta waxa ku jira, wax ka bedelka qoraalka diiwaangelinta shirkad jirta, dib u qorista qoraalka diiwaangelinta, qoraalada isku biirista, iyo qoraalada

kale si kasta oo loo dhigoba ee la geliyay diiwaanada Diiwaanhayaha ee leh Raadka wax ka bedelid ama kaabid qoraalka asalka ah ama wax laga bedelay ee diiwaangelinta shirkad jirta

**Cinwaanka sekedda:** waxa loola jeedaa magaca iyo lambarka sekedda, magaalada, gobolka iyo (hadii aanay ahayn gudaha Jamhuuriyadda Somaliland) dalka, iyo furaha boosto, hadii uu jiro, ee looga baahan yahay in waraaqo lagu gaadhsiiyo goob. Hadii sabab reer guuraanimo ama sabab kale awgeed magaca iyo lambarka sekedda iyo magaalada aanu jirin cinwaanka sekedda waxa loola jeedaa tilmaamidda ugu haboon ee lagu sheegayo sida ugu suuragalsan goobta

**"Shirkada soo hadhaya"** waxa loola jeeda shirkada uu ku biiray Shirkad ama shirkado si waafaqsan qodobka 55 ama si waafaqsan sharci kale oo aan ahayn xeerkan.

**Magaca saxda ah:** marka ay la xidhiidho qof dabiici ah waxa loola jeeda magaca oo sadexan ee qofka; marka ay la xidhiidho shuraako waxa loola jeeda magaca saxda ah ee qof kasta oo ka mid ah shuraakada, marka ay tahay shirkadna magaca shirkadda, marka ay tahay Shirkad shisheeyena magaca shaqaynaya ee u dhigma `

## Qodobka 2aad
## Magaca Xeerka

Xeerkan waxa loogu yeedhayaa Xeerka Shirkadaha Somaliland Xeer Lr.80/ 2017

## Qodobka 3aad
## Fasiraadda Xeerka

Xeerkan dhexdiisa, waxaa loo fasiranayaa si waafaqsan Dastuurka iyo danta guud ee mabaa'diida Xeerarka Caalamiga ah.

## QAYBTA 2AAD

## CUTUBKA 2AAD
## GANACSIGA, AWOODAHA IYO HAWL GALLADA

### Qodobka 4aad
### Ujeeddada Ganacsi

Shirkad waxa loo aasaasi karaa si waafaqsan xeerkan ganacsi kasta oo sharci ah, ha noqdo mid faa'iido laga raadinayo ama mid aan faa'iido laga raadinayn, iyada oo ay shardi tahay in laraaco sharciga Somaliland ee dhaqangalka ah ee maamulaya ama nidaaminaya ganacsigaas

[

### Qodobka 5aad
### Shakhsiyada Qaanuuniga ah ee Shirkadaha

(1) shirkad kasta oo loo aasasay una jirta si waafaqsan xeerkan waxay leedahay shaqsiyad qaanuuni ah oo gaar ah:

(a) iyada oo magaceeda adeegsanaysa waxbay dacwayn kartaa waana la dacwayn karaa, way caban kartaa wayna is difaaci kartaa, waxayna ka qayb geli kartaa dacwad kasta oo idaari ah ama mid aan ahayn

(b) waxay iibsan-kartaa, qaadan kartaa, heli kartaa, kiraynaysaa ama si uun kale u soo geli-kara, yeelana-kartaa, gacanta ku haynaysaa, horumarinaysaa, isticmaalaysaa islamarkaana si kale ugu tasarufi kartaa hanti ama dan hanti ku jirta meel kasta oo ay taal

(c) cid kale ayay u igman kartaa, rahmi kartaa, kirayn kartaa, wax ku bedelan kartaa, cid siin kartaa ama si uun kale ugu tasarufi kartaa dhamaan ama qayb ka mid ah hantideeda

(d) Waxay amaahin kartaa islamarkaana si uun kale u caawin kartaa Saamilayda iyo shaqaaleheeda

(e) Waxay iibsan kartaa, qaadan kartaa, heli kartaa, isku-qori kartaa ama si uun kale u heli kartaa, yeelan kartaa, gacanta ku dhigi kartaa, u codayn

karta, isticmaali kartaa, maamuli kartaa, iibin kartaa saamiyo ama dano kale ama waajibaad saaran qof kale

(f) waxay geli kartaa heshiisyo iyo balan qaadyo islamarkaana waxay qaadan kartaa masuuliyaad (liabilities),wayna amaahan kartaa lacag, soo saari kartaa, saamiyo isku xidhan (bonds) iyo waajibaad kale waxayna ku bixinasaa waajibaadkeeda inay rahanto dhamaan ama qayb hantideeda, ganacsiyada hoos yimaadda (franchises) iyo dakhligeeda.

(g) waxay u amaahin kartaa lacag ujeedo sax ah, wax ku maalgalin kartaa maalkeeda, qaadan kartaa, haysan kartaana hanti si ay isaga bixiso maal ay soo amaahatay ama wax ku maalgashatay

(h) Waxay u qaban kartaa ganacsigeeda, wadi kartaana hawlgaladeeda, ayna ku isticmaalaysaa awoodaha uu siiyay sharcigani ikhtisaaska dal kasta.

(i) Waxay yeelanaysaa maareeyayaal iyo wakiilo

(j) Waxay dhinac ka noqonaysaa xeer hoosaadka

(k) Waxa uga damaanad qaadi kartaa Saamile ama maareeye shirkadda ka tirsan ama Saamile hore ama maareeye hore oo shirkaddu ka tirsanaa si waafaqsan qodobka 39aad ee xeerkan (l) Waxay leedahay isticmaali kartaana dhamaan awoodaha daruuri u ah ama ku haboon dhamaan ama qayb ujeedooyinka loo aasaasay shirkadda

(m) Waxayka noqonasaa wakiil, maareeye, Saamile, shurug, kobciye, amaane-haye, ama ka qaban kartaa jago kale oo la mid ah Shirkad, isutag, urur, shuraako, amaano ama hanti ma-guurto ah (estate).

## Qodobka 6aad
## Noocyada Shirkadaha

Shirkad kasta oo doonaysa in la diwaangeliyo waa in ay ahaato

1. Shirkad Gaar loo leeyahay (Private Company)
2. Shirkad Dadweyne (Public Company).

## Qodobka 7aad

## Dabeecadaha ay leeyihiin Shirkadaha Gaarka loo leeyahay

Shirkad gaar loo leeyahay waxay yeelanaysaa dabeecadahan: -

1. Waxaa xadidan xuquuqda saamiluhu uu ku wareejinayo saamigiisa
2. Waxaa xadidan tirade saamilayaasha saamiga ku leh shirkada
3. Waxaan la ogolayn in si daahfuran loo soo bandhigo saamiyada shirkada
4. Shirkad kasta oo saamigeedu ka bilaabmo hal saami iyo wixii ka badan waxa loo aqoonsanayaa shirkad gaar loo leeyahay
5. Shirkad kasta oo ku cadaysa qoraalka aasaasida ee ku cad qodobka 12aad in ay tahay shirkad dadwayne ama shirkad gaar loo leeyahay- hadii ay cadayn waydo waxay noqonaysaa shirkad dadwayne.

## Qodobka 8aad

## Isa siinta awoodo aanu lahayn

Cid kasta oo aaminta inay ficil ah u samayso sidii oo ay yihiin shirkad iyaga oo aan u haysan awood inay sidaas sameeyaan islamarkaana si aan niyad samayn u aamina inay awoodaas leeyihiin waxay si wada jir ah iyo si kala gaar gaar ahba ay masuul uga yihiin deymaha iyo masuuliyaadka (liabilities) ay galeen cidda ficilkaas samaysay.

## Qodobka 9aad

## Macaamilka Ganacsi ee ka baxsan Jamhuuriyadda Somalialnd

Xeerkani wuxuu aqoonsan yahay in xuduuda jiritaanka sharci ee shirkadaha loo aasaaay si waafaqsan Xeerkan iyo shirkadaha jira uu ku fidsan yahay debedda Jamhuuriyadda Somaliland.

## Qodobka 10aad

## Mas'uuliyadda Saamilayda

In shirkadi ku guuldaraysato inay raacdo hanaanka ama

shuruudaha la xidhiidha maamulka ganacsigeeda iyo hawlaheeda uma noqon karto sabab loo saaro masuuliyad shirkadu leedahay masuuliyad shaqsi ah (personal liability) saamilayda.

## CUTUBKA 3
## AASSAASIDDA

### Qodobka 11aad
### Aasaasidda Shirkadaha

Hal qof iyo in ka badan ayaa aasaaasi karra shirkad iyaga oo u keenaya qoraalka aasaasidda (Statement of Formation) Diiwaan-hayaha si waafaqsan Cutubka 12aad ee Xeerkan. Qofka dabiiciga ah ee aasaasaya shirkad waa inuu noqda ugu yaraan 18 jir miyir qaba, daruuri maaha in qofkaas ama dadkaasi ay Saamile ka noqdaan shirkadda kadib marka la aasaaso.

### Qodobka 12aad
### Qoraalka Aasaasidda (Statement of formation)

(1) Qoraalka aasaasidu waa in ay ka muuqataa: -
- (a) magaca shirkadda oo waafaqsan cutubka **3a**ad ee Xeerkan
- (b) Cinwaanka Xafiiska Guud ee shirkadu yeelato bilawga
- (c) Magac saxda ah iyo cinwaanka waraaqaha loogu diri karo ee dadka aasaasaya shirkadda
- (d) In maamulka shirkadu uu gacanta ugu jiro mid ama in ka badan oo maareeyayaal ah ama inuu gacanta ugu jiro **s**aamiley, mid kasta oo ay tahay
- (e) In ugu yaraan shirkadu leedahay hal Saamile
- (f) Wax kasta oo kale oo dadka aasaasaya shirkadu go’aansadaan inay ku daraan qoraalka aasaasida

### Qodobka 13aad
### Dhaqangalka diiwaangelinta qoraalka aasaaska

Shirkadi waxay aasaasantaa marka qoraalka aasaasidu dhaqan galo

## Qodobka 14aad
## Jiritaanka shirkad

Xaqiiqda ah in qoraalka aasaasid#du uu ku jiro diiwaanka Diiwaan-hayaha waxay marag ka tahay in shirkadu tahay shirkad iyo dhamaan xaqaa'iqa kale ee looga baahan yahay in lagu daro qoraalka aasaasidda sida ku cad Qodobka 12aad ee xeerkan

## Qodobka 15aad
## Wax-ka-bedelka Qoraalka Aasaasidda

(1) Iyada oo qoraalka aasaasidda wax ka bedel lagu samayn karo waqti kasta ujeedo kasta hadana waxaa waajib ah in wax ka bedel lagu sameeyo marka:
   (a) Is-bedel ku yimaado magaca shirkadda
   (b) Uu ku jiro hadal qalad ah qoraalka aasaasidda

(2) Wax ka bedelka qoraalka aasaasidda waa waxba kama jiraan hadii aanay ansixin dhamaan saamilaydu ama aan wax looga bedelin habkii kale ee ku dhigan qoraalka aasaasidda

(3) Shirkadi waxay wax ka bedeshaa qoraalka aasaasidda marka ay u soo gudbiso wax ka bedelka Diiwaan-hayaha si uu u diiwaangeliyo si waafaqsan cutubka 14aad ee Xeerkan iyada oo sheegay:
(a) Magaca shirkadda
(b) Wax ka bedelka qoraalka aasaasidda

# CUTUBKA 4
# MAGACYADA SHIRKADAHA

## Qodobka 16aad
## Magaca Shirkadda

1. Magaca shirkadda kuma jiri karo odhaah jebinaysa sharci ka dhaqan gal ah Jamhuuriyadda Somaliland.
2. Magac shirkadeed kastaa waa inuu ka duwanaadaa kuwa ku jira diiwaanka Diiwaan-hayaha ee:
   (a) Magaca shirkad kasta oo kale
   (b) Magaca loo dhigo shirkad kale si waafaqsan Qodobka 20aad

3. Magaca shirkadeedka waxa ku jiri kara, iyada oo aanay shardi ahayn, ereyadan ama soo gaabintooda: shirkad masuuliyadu ku xadidan tahay saamiyada (Company limited by shares) shirkad laga dhigay (incoprated), shirkad (company), xadidan (limited) iyo soo gaabintooda (inc, co, ltd, llc, ama ereyo oo leh micne la mid ah
4. Magaca shirkadu shardi maaha inuu noqdo Soomaali ama Ingiriisi hadii uu ku qoran yahay ereyo Soomaali ama Ingiriisi wuxuu noqon karaa AF-ingiriisi ama AF-Soomaali ama tiro.

## Qodobka 17aad
## Magac shirkadeedka shirkad lakala diray

Hadii shirkad la kala diro magaca shirkadda la kala diray waa in lagu daraa ereyga la kala diray oo ay la socoto bisha, maalinta iyo sanadka kala diridda shirkadu dhaqangalay

## Qodobka18aad
## Magac shirkadeedka shirkad tahli-waaga ah

Magaca shirkadda kacday waa in lagu daraa ereyga kacday (insolvent) oo ay raacayso bisha, maalinta iyo sanadka ay kacday, sida ku cad qodobka 74aad ee xeerkan.

## Qodobka19aad
## Magac shirkadeed dhigaal ah

1. qof kasta ayaa soo codsan kara in loo dhigo (reservation) magaca shirkadeed si uu si gaar ah ugu isticmaalo isaga oo usoo gudbinaya codsi qoraal ah Diiwaan-hayaha si loogu diiwaangeliyo si waafaqsan cutubka 12aad ee Xeerkan, isaga oo sheegaya magaca iyo cinwaanka waraaqaha loogu diri karo qofka, in qofku codsiga u soo gudbinayo si loogu dhigo magac uu u isticmaali doono shirkad, iyo magaca uu soo jeedinayo in loo dhigo.

2. Hadii Diiwaan-hayuhu go'aansado in magaca la soo codsaday loo isticmaali karo magac shirkadeed si wafaqsan qodobka 16aad, Diiwaan-hayuhu wuxuu u dhigayaa magaca in uu si gaar ah u leeyahay qofku mudo sagaashan maalmood ah, iyada oo dhigaalka la cusboonaysiin karo marar kale sagaashan maalmood. Codsiga dhigaalka magac ma sheegi karo in dib loo dhigo taariikhda dhaqangalka.

3. Qofka loo dhigay magaca wuxuu siin karaa magaca dhigaalka ah qof kale isaga oo Diiwaan-hayuhu u soo gudbinaya si uu u diiwaangeliyo si waafaqsan cutubka 12aad ee Xeerkan, siiyuhu waa inuu soo gudbiyaa codsi bixin magac dhigaal ah isga oo sheegay magaca dhigaalka ah, qofka lahaa, iyo magaca iyo ciwaanka waraaqaha loogu hagaajinayo qofka la siinayo magaca dhigaalka ah.

4. Hadii qoraalka aasaaska oo sheegaya taariikhda dhaqangalka oo dib loo dhigay la geliyo diiwaanka Diiwaan-hayaha, magaca shirkadda ee ku jira qoraalka aasaaska waxa laga soo qaadayaa inuu yahay dhigaal ilaa qoraalka aasaasku dhaqangal noqdo

## Qodobka 20aad
## Qaadashada magacShirkad shisheeye
[

Hadii magaca shirkadeedka shirkad shisheeye uu rabo inuu uisticmaalo magac ahaan aan loogu isticmaali Karin magac shirkadeed si waafaqsan qodobka 16aad ee xeerkan, shirkada shisheeye si uu ugu helo ogolaansho inu ka qabto ganacsi ama ka fuliyo hawlo gudaha Somaliland, waa inuu qaataa magac Shirkadeed uu ku isticmaalo Somaliland gudeheeda kaas oo loo isticmaali karo magac shirkadeed si waafaqsan qodobka 16aad ee xeerkan.

## **Qodobka 21aad**
## **Magaca shirkada shisheeye iyo magaca ganacsi ee Shirkad shisheeye oo dib loola noqday**

Hadii shirkada shisheeye leeyahay qoraalka ogolaanshaha lagu siiyay shirkada shisheeye oo ku jira diiwaanada Diiwaan-hayaha, balse ogolaanshahaas laga tanaasulay, magac shirkadeedka shirkada shisheeye waa inay la socdaan ereyadani "Jamhuuriyadda Somaliland ogolaansheheedii waa laga tanaasulay" oo dabada laga sii raacinayo taariikhda dhaqangalka qoraalka dib u noqoshada shirkada shisheeye ee shirkada shisheeye kaga tanaasulay ogolaanshihiisa.

# **CUTUBKA 5**
# **SAAMIILAYDA**

## **Qodobka 22aad**
## **OgolaanshahaSaamilay Cusub**

1. Kadib marka la diiwaangeliyo qoraalka aasaaska hore ama qoraalka diiwaangelinta shirkad jirta, qof ama in ka badan ayaa laga dhigi karaa Saamile ama saamileyaal dheeraad ah oo ku soo bira shirkaddda iyadoo marka la ogolaanayo ama lagu soo darayo saamile cusub waa in ay ansixiyaan sadex meelood laba dalool 2/3 oo ah tirade guud ee saamilayda.
2. Mar kasta oo shirkadi noqoto bilaa saamiley, marka la helo ogolaansho ay isku raacsan yihiin dhamaan dadka haysta igmashada ama wareejinta (assignment or transfer) dan Saamile ee Saamilihii u danbaysay ee shirkada, hal qof ama in ka badan oo uu ku jiro qof Saamilihii u danbaysay ee shirkadu igmatay ama u wareejisay dan Saamile, ayaa laga dhigi karaa Saamile ama saamilayaal.

## **Qodobka 23aad**
## **Danta Shirkad Lagu Leeyahay Iyo Wareejinta Danta**

1. Danta qof ku leeyahay shirkad waa hanti shaqsi ah oo Saamiluhu leedahay cid bayna u igman kartaa ama wareejin kartaa. Hadii aan igmanaha ama loo

wareejiyaha (assignee or transferee) laga dhigin Saamile ka mid ah shirkadda, igmanaha ama loo wereejiyuhu waxa uu xaq u leeyahay oo keliya inuu helo faa'iidada saamiga ama wixii kale ee laga dheefo qaybinta dakhliga ee Saamilehaasi uu xaq u yeelan lahaa umana laha xaq inay ka qayb qaadato maamulka ganacsiga iyo hawlaha shirkadda ama inay noqoto Saamile

2. Saamile way luminaysa Saamiga marka ay igmato ama wareejiso dhamaan danta Saamile ee Saamilaha Qofka danta Saamile loo igmaday ama loo wareejiyay islamarkaana la aqbalay inuu Saamile noqdo ayaa leh dhamaan xuquuqaadka iyo awoodaha ay raacsan tahay dhamaan dabarada (restrictions) iyo masuuliyaadka (liabilities) igmadaha ama wareejiyaha ee la xidhiidha qaybta danta Saamile ee la igmaday ama wareejiyay. Aqbalaada Saamiga igmanaha ama loo wareejiyaha waxay ka sii daynaysa cidii igmatay ama u wareejisay dhamaan masuuliyaadka shirakadu ku leedahay ee aan ka ahayn masuuliyaadka ku dhigan Qodobka 42aad Iyo Qodobka 49aad

3. Qofka qayb danta Saamile ee loo igmaday ama loo waareejiyay islamarkaana la aqbalay Saamilenimadiisa ayaa leh dhamaan xuquuqaadka iyo waajibaadka iyada oo ay la socdaan dabarada iyo masuuliyaadka kii igmaday ama u wareejiyay saarnaa ee la xidhiidha qaybta danta Saamile ee loo igmaday ama loo waareejiyay. Aqbalaadda Saami inuu yeesho igmadaha ama loo waarejiyuhu waxay dhamaysaa (terminates) xuquuqaadka iyo awoodaha igmadaha ama waareejiyaha ee la xidhiidha qaybta danta Saamile ee la igmaday ama la waarejiyay waxayna ka sii daynaysa igmadaha ama wareejiyaha dhamaan masuuliyaadka shirakadu ku leedahay ee aan ka ahayn masuuliyaadka ku dhigan Qodobka 42aad Iyo Qodobka 49aad.

## Qodobka 24aad

## Xuquuqda Danynluhu Ku Leeyahay Saamile

Marka codsi uu u soo gudbisto maxkamad awood u leh qof loo fuliye ah (judgment creditor) oo Saamile dayn ku leh, maxkamadu waxay saari kartaa danta Saamile ee qofka in laga bixiyo inta aan la bixin ee xukunka fulinta, waxayna markaas ama kadib u magacaabi kartaa gudoome (receiver) faa'iiadada saamiga Saamilaha iyo lacag kasta oo kale oo Saamilehu ku hesho Saamigiisa shirkadda, wuxuuna samaynayaa gudoomuhu dhamaan amarada, tilmaamaha, xisaabaadka iyo baadhitaanka Saamilaha dayn qabaha ahi samayn lahayd, ama duruufaha dacwadu ay keensanayso. Ilaa xadka uu ku leeyahay, marka laga reebo sida ku dhigan qodobkan, loo fuliyuhu wuxuu ku leeyahay oo keliya xaq igmane ama loo waarejiye danta Saamile. Danta Saamile ee maxkamadu qabatay waa lala soo noqon karaa waqti kasta ka hor intaan lala wareegin (foreclosure). Hadii iibinta ay amarto maxkamadi, danta Saamile waa la iibsan karaa iyada oo lagu samaynayo kala dirid (dissolution) hantida gaarka ah ee hal Saamile ama in kabadan. Marka ay ogolaadaan dhamaan saamilayda aan dantooda Saamile la haysan ama la iibin, danta Saamile waa la iibsan karaa iyada oo aan lagu samaynayn kala dirid hantida shirkadda. Xeerkani kama qaadi karo Saamile faa'iiadda xeerar ka gaar yeelaya oo ku dabaqmaya danta Saamile ee Saamilaha.

## Qodobka 25aad

## SaamilaydaDabiiciga Ah Ee Dhinta Ama Aan Awood Lahayn Iyo Saamilayda Aan Dabiiciga Ahayn Ee La Kala Diro Ama Dhamaada (Terminated)

1. Hadii qof dabiici ah oo Saamile ka ah shirkad uu dhinto ama maxkamad awood u lihi u magacawdo ilaaliye (guardian) Saamilaha, fuliyaha (executor), maamulaha, ilaaliyaha ama wakiilkiisa kale ee sharci ayaa isticmaalaya dhamaan awoodaha cida Saamiluhu igmatay ama u wareejisay.
2. Hadii Saamile aan ahayn qof dabiici ahi kacdo ama baaba'do, wakiilka sharci ama dhaxlaha

Saamilaha ayaa isticmaalaya dhamaan awoodaha igmanaha ama loo waarejiyaha Saamilaha.

## Qodobka 26aad
## Masuuliyadda (Liability) Saamilayda Iyo Maareeyayaasha

Saamilaha iyo maareeyayaasha shirkaduhu masuul Kama aha (not liable) xukun, qaraar ama amar maxkamadeed oo shirkad ka dhan ah, ama dayn, waajib ama masuuliyad shirkadda saaran.

## Qodobka 27aad
## Codaynta

1. Iyada oo la raacayo qodobada xeerkan ee shardiyaya cod aqlabiyad ah (majority) ama ogolaansho la isku raacay (unanimous consent), cod bixin ama gelidda heshiis waxa xeer hoosaadku siinayaa dhamaan saamilayda ama koox cayiman inay xaqooda ogolaansho, codbixineed ama heshiis gelid lagu saleeyo saamiga Saamile waliba leedahay ama si ka duwan.
2. Saamile waxa u codayn karta iyada oo joogta ama soo dirsada cid isaga u metesha cod bixinta (proxy)

## Qodobka 28aad
## Dacwadda uu soo oogo saamile isaga oo ka wakiil ah shirkada

1. Saamile wuxuu bilaabi karaa ama sii wadi karaa dacwad ka dhan ah cid kale isaga oo ka wakiil ah shirkadda si waafaqsan cutubka 4aad keliya, marka;
   (a) Saamiluhu uu ka ahaa Saamile shirkadda waqtiga ficilka ama ficil ka joogsiga laga cabanayo ama danta Saamile ee lagu leeyahay shirkadaas ay ka dhalatay dhaqangal xeer
   (b) Ay u muuqato in Saamiluhu uu si xaq ah oo ku filan u metelo danaha saamilayaasha kale si la mid ah ay u taabanayso fulinta xaqa shirkad

2. Cutubkan gudihiisa, dacwadda uu soo oogo saamile isaga oo ka wakiil ah shirkada waxa looga jeeda dacwad madani ah oo la xidhiidha xaqa shirkad.

**Qodobka 29aad.**

**Codsiga Dacwadda uu soo oogo saamile isaga oo ka wakiil ah shirkada**

1. Saamile ma bilaabi karo dacwad uu kaga wakiil yahay shirkadda (derivative proceeding) si waafaqsan cutubka 5aad hadii aan:
   a) Dalab qoraal ah loo soo gudbin shirkadda si ay u qaado ficil laga dacwoon karo
   b) Sodon maalmood dhicin laga bilaabo taariikhda dalabka loo gudibyay; marka laga reebo in dhicitaanka sodonka maalmood aanay shardi ahayn marka:
      I. Saamile la ogaysiiyay ka hor dhicitaanka mudada sodonka maalmood ah in dalabka ay diiday shirkadu.
      II. Dhaawac aan laga kaban karini soo gaadhayo shirkadda hadii la sugo dhicintaanka xilliga sodonka maalmood ah

**Qodobka 30aad**

**Hakinta Dacwaddaha lagu soo oogo saamile isaga oo ka wakiil ah shirkada**

Si loogu ogolaado in la siiyo shirkadda waqti ay ku baadho eedaha loo soo gudibyay ee ku jirta dalabka ama cabashada loo bilaabay si waafaqsan cutubka 4aad, maxkamaddu waxay hakinaysaa dacwadda laga wakiilka yahay shirkadda (derivative proceeding) mudadda ay u aragto inay ku haboon tahay.

**Qodobka 31aad.**

**Diidmada Dacwadda uu soo oogo saamile isaga oo ka wakiil ah shirkada**

1. Dacwad lagu metelayo shirkadda (derivative proceeding) ee loo bilaabay si waafaqsan cutubka

4aad maxkamaddu waa inay diidaa marka ay hesho soo jeedinta shirkadda hadii mid ka mid ah kooxaha ku tilmaaman farqadda (2) ee qodobkan uu u go'aamiyo si niyad sami ah kadib marka uu sameeyo baadhitaan, in sii socoshada dacwadda lagu metelayo shirkadda aanay ugu jirin shirkadda dani.

2. (a) iyada oo la raacayo shuruudaha ku dhigan farqadda (2aad) (b) ee qodobkan, go'aanka in sii socoshada dacwadda ay dani ugu jirto shirkadda waxa gaadhaya maareeye madax banaan oo shirkadu leedahay ama hadii ay jiraan wax ka badan hal maareeye aqlabiyadda maareeyayaashaas; marka laga reebo marka aanay jirin maareeye madax banaan oo shirkadu leedahay ama aqlabiyadda maareeyayaashu ay awoodi waayayaan inay gaadhaan go'aan, goaanka waxa qaadanaya saamilayda madaxa banaan ee shirkadda

(b) Hadii go'aan loo gaadhi waayo si waafaqsan farqada (2)(a), go'aanka waxa qaadanaya qofka ama, hadii uu jiro in ka badan hal qof, aqlabiyadda dadka ka midka ah gudi (panel) ka kooban hal qof ama in kabadan oo ay magacaabtay maxakamadu kadib marka ay soo jeedin la xidhiidha arinkaas ay u soo gudbiso shirkaddu.

2. maxkamadu waa inay u magaacbtaa dad madax banaan gudida (panel) lagu sheegay farqadda(2aad) (b) ee qodobkan

3. Midkoodna arimahan soo socda iskood ugama dhigayaan qof in laga soo qaado inaanu ahayn qof madax banaan ujeedada ku xusan farqadda (2aad) ee qodobkan:

(a) In lagu magacaabo qofka dacwaysanaha dacwadda lagu metelayo shirkadda ama qofka in ficil laga qaado la dalbaday

(b) Ansixinta in qofkaas ficilkiisa lagu soo oogay dacwadda ama dalabka marka ficilka laftigiisu aanu dhalin faa'iido gaar ah oo qofkaasi helo

(c) Inuu sameeyay dalabka si waafaqsan qodobka 30 ama bilaabidda dacwada si waafaqsan qodobkan

4. iyada oo la raacayo qodobka 32aad, gudida ay u magacaabatay maxkamadu si waafaqsan farqadda (2aad) (b) ee qodobkan, waxay leeyihiin awoodda inay sii wadaan, xaliyaan ama joojiyaan dacwadda hadba awoodda ay siiso maxkamaddu
5. Dacwoodaha dacwadda ayay waajib ku tahay inuu cadeeyo in shurudaha ku dhigan farqadaha (1) iyo (2) aan la buuxin.

## Qodobka 32aad
## Joojinta Ama Ka Heshiinta Dacwadda

Dacwadda lagu bilaabay si waafaqsan cutukba 5aad lama joojin karo lagamana heshiin karo iyada oo aanay ogolaan maxkamadu. Marka maxkamadu go'aansato in soo jeedinta joojinta ama heshiisku ay saamayn wayn ku leedahay saamilayda shirkadda, maxkamaddu waa inay ogaysiis gaadhsiisaa Saamilayda ay saamaynayso.

## Qodobka 33aad
## Qarashka Dacwadda

Ka go'aan gaadhidda dacwadda loo bilaabay si waafaqsan cutubka 4aad, marka maxkamadu qaraariso si u dan ah shirkadda, maxkamadu waxay amri kartaa in shirkadu siiso dacwoodaha qarashka macquulka ah ee uu galay dacwooduhu, oo ay ku jirto xushamadda qareenka. Oodiidda dacwadda loo bilaabay si waafaqsan cutukba 5aad, marka maxkamadu qaraariso in dacwadda la bilaabay ama la sii waday iyada oo aanay jirin sabab macquul ah ama ujeedo aan habonayn, maxkamadu waxay amri kartaa in dacwooduhu siiyo dacwaysanaha qarashka macquulka ah ee uu galay dacwaysanuhu, oo ay ku jirto xushmadda qareenka.

## Qodobka 34aad
## Helida iyo Ilaalinta Xogta Sirta ah, Iyo Diiwaanada Xisaabaadka

**1)** Saamile kasta oo shirkada ka mid ah wuxuu xaq uleeyahay, isaga oo raacaya halbeegyo macquul ah oo saamilayaasha ama maareeyayaashu usameeyeen si

waafaqsan qodobka 36aad farqada (1), inuu baadho uuna rogto (Copy) isaga oo iska bixinaya qarashka diiwaanada soo socda waqti kasta isaga oo soo gudbinaya codsi macquul ah ujeedo kasta oo la xidhiidha danta saamiilaha ee saamiga shirkada.

- **a)** Xog run ah oo buuxda oo la xidhiidha xaalada ganacsi iyo maaliyadeed ee shirkada oo ay ku jiraan qaraarada iyo hadal qoraalada shirarka(minutes), hadii ay jiraan
- **b)** Nuqul ah cashuuraha shirkadu bixiso, diiwaanada iyo risiidhada sanad walba
- **c)** Taxa magaca iyo cinwaankii u danbeeeyey ee goobta ganacsi, deganaansho iyo cinwaanka qoraalada (mailing address) ee saamiile walba iyo maareeye kasta
- **d)** Nuqul qoraalka aasaaska shirkadda ama qoraalka diiwaangelinta shirkada jirta iyo nuqul xeer hoosaadka qoran ee shirkada
- **e)** Xog run ah oo buuxda oo la xidhiidha qadarka lacagta iyo tilmaanta iyo qoraalka qiimaha lagu heshiiayay ee hantida kale ama adeegyada uu ku darsaday shirkadda saamile waliba iyo ta saamile waliba ku balanqaaday inuu ku darsanayo shirkada mustaqbalka, iyo taariikhda saamile waliba ku soo biiray shirkada.
- **f)** Xogtii kale ee macquul iyo cadaalad ah ee la xidhiidha arimaha shirkada

**2)** Maareeye kasta wax uu xaq uleeyahay inuu baadho dhamaan xogta ku dhigan farqadda(1)(a) ee qodobkan ujeedo si macquul ah ula xidhiidha jagada maareeyaha

**3)** Saamiile kasta wuxuu xaq uleeyahay inuu ka sir haysto(confidential) saamilayaasha, waqtiga saamilayaasha ama maareeyayaasha u arkaan macquul xog kasta oo saamiilayaasha ama maareeyayaashu si macquul ah ula muuqata inay tahay dabciga sir ganacsi (trade secret) ama sharciga ama heshiis ay kula jiraan cid kale ku waajibanayo shirkada inay u hayso sir ahaan

**4)** Shirkadu waxay diiwaanadeeda ku hayn kartaa qaab

kale oo aan qoraal ahayn hadii qaabkaas loo bedeli karo qaab qoran muddo macquul ah guddahood

**5)** Codsi kasta oo saamiluhu u sameeyo si waafaqsan qodobkan waa inuu noqdaa mid qoran uuna sheegaa sababta codsiga

**6)** Saamiluhu waxa uu xaq uleeyahay inuu ku yeesho hab-xisaabeed rasmi ah arimaha shirkadda marka kasta oo duruuftu ka dhigto macquul

## CUTUBKA 6
## MAAMULKA

### Qodobka 35aad
### Magacaabista Maareeyayaasha

Saamilayda shirkadda ayaa, haddii qoraalka aasaasku ama qoraal diiwaan gelinta shirkada jirta uu dhigayo in maamulka shiradda. Maareeye ama in ka badan, u xilsaaraya hal maareeye ama in ka badani maamulka shirkadda. Maareeyaha qof dabiici ahi waa in uu noqdaa ugu yaraan 18 jir. Maareeyayaasha waaxa xil loogu dhiibi karaa loogana qaadi karaa go'aan aqlabiyad ah oo ay gaadhaan saamilaydu.

### Qodobka 36aad
### Awoodda maamulka shirkadda

(1) Marka laga reebo habka ku dhigan farqada (2) ee qodobkan go'aanada la xidhiidha shirkadda waxaa gaadhaya aqlabiyadda saamilayda ama haddii shirkadda ay maamulaan hal maareeye ama in ka badan aqlabiyada maareeyayaasha.

(2) Oglaashaha saamile walba waa shardi marka

(a) Wax laga bedelayo qoraalka aasaaska (statement of information) ama qoraalka diwaan gelinta jirta

(b) Waxa laga bedelaayo xeer hoosaadka

(c) La ogolaanayo ficil ay shirkadu samaynayso oo aan ahayn hawsha caadiga ah ee ganacsi ee shirkada

(3) Saamilaha ama saamilayaasha loo oglaan doono in ay ka noqdaan shirkada saamile ama saamilayaal si waafqsan qodobka 22aad (2) waxay ogolaasho

laysku raacay ku bedeli karaan xeer hoosaadka isaga oo dhaqan geliya isla markaana ka hor aqbalida qofka ama dadka.

**Qodobka 37aad**
**Saraakiisha iyo wakiilada**

(1) Shirkadu waxay yeelan karta hal ama in ka badan oo saraakiil ama wakiilo ah oo leh shaqada, xuquuqda, waajibaadka iyo awoodda (authority) ay siiso shirkaddu. Sarkaalka ama wakiilka ah qof dabiici ah waa inuu noqdaa ugu yaraan 18 jir. Marka laga reebo sida ku dhigan farqadda (2) ee qodobkan, saraakiisha iyo wakiilada kale waxa xilka loogu dhiibi karaa, laga qaadi karaa, shaqadooda, xuquuqdooda, waajibaadkooda iyo awoodoodana lagu dejin karaa oglaansho ay bixiyaan aqlabiyadda saamilaha shirkadda, ama hadii shirkadu leedahay hal maareeye ama in ka badan aqlabiyadda maareeyayasha.

(2) Saraakiisha iyo wakiilada kale waxa keliya oo u siin kara awood inay qabtaan shaqo ka baxasan hawsha caadiga ah ee ganacsiga shirkadda dhamaan saamilayada shirkadda oo wada ogolaada

**Qodobka 38aad**
**Waajibaadka saamilayda iyo maareeyayaasha**

(1) Iyada oo ay dheer tahay waajibaadka lagu sheegay qodobada kale ee xeerkan, waajibka shirkadu ku leedahay Saamile walba marka maamulka shirkadu gacanta ugu jiro saamilayad iyo maareeye kasta waa:

(a) Inuu hayo una noqoto amaane-haye (trustee) hantida, faa'iidada, ama dheefta uu Saamiluhu ama maareeyuhu ka soo saaray hantida shirkadda ama ka soo saaro hawsha ama dhamaynta iyo xisaabinta (winding up) ganacsiga shirkadda ama ka soo saaro isticmaaluu isticmaashay Saamiluhu ama maareeyuhu hantida shirkadda oo ay ku jirto

maamulidda hantida shirkadda

(b) Inuu ka joogo inuu ula tacaamusho hawsha ganacsi ee shirkadda ama dhamaynta iyo xisaabinta shirkadda isaga oo ah ama metelay dhinac leh dan ka soo horjeedda shirkadda.

(c) Inuu ka joogo inuu kula tartamo shirkadda hawlaha ganacsi ee shirkadda ka hor kala diridda shirkadda

(2) Saamile kasta oo ka mid ah shirkad qoraalka aasaaska ama qoraalka diiwaangelinta shirkad jirtaa dhigayo in maamulka ay gacanta ku hayaan saamilayaashu, iyo maareeye kasta waxa shirkadu ku leedahay inay daryeelaan hawlaha ganacsi ee shirkadda iyo dhamaynta iyo xisaabinta, taas oo ku eeg inay ka joogsadaan inay sameeyaan ficil dayacaad ama taxadar xumo ah, ficil qaldan oo ku talo gal ah, ama si ku talo gal ah inay u jebiyaan sharciga.

(3) Saamile kasta iyo maareye kastaa waa inuu u gutaa waajibaadkiisa Saamile ahaan ama maareeyenimo ee ka saaran shirkadda una isticmaalaa xuquuqdiisa si waafaqsan waajibka heshiis ee niyad sami iyo tacaamul sax ah

(4) Saamile ka mid ah shirkad qoraalka aasaasku ama qoraalka diiwaangelinta shirkad jirtaa dhigayo inay maamulka gacanta ku hayaan saamilayaashu, ama maareeye kuma jabinayo waajibaadka ka saaran shirkadda in ficilka Saamilaha ama maareeyuhu uu kordhiyay danta gaarka ah ee Saamilaha ama maareeyaha.

(5) Saamile ama maareeye wuu amaahin karaa lacag, lana samayn karaa macaamil kale oo ganacsi shirkadda, dayn kasta iyo macaamil kastana waxa xuquuqda iyo waajibaadka Saamilaha ama maareeyaha loola dhaqamayaa si la mid ah dadka aan Saamilaha ama maareeyaha ka ahayn shirkada iyada oo la raacayo shuruucda khusaysa.

## Qodobka 39aad
## Reebanaanta Wakiilnimada Saamilayda

(1) Hadii qoraalka aasaasku ama qoraalka diiwaangelinta

shirkad jirtaa dhigayo in maamulka shirkada ay leeyihiin hal maareeye ama in ka badan:

(a) Saamiluhu uma aha wakiil shirkadda islamarkaana inuu yahay Saamile kuma filna inay awood ku yeesho Saamiluhu shirkadda

(b) Maareeye kastaa wuxuu wakiil uga yahay shirkadda ganacsigeeda, ficil maareeye sameeyo oo uu ku jiro ku soo saarsita qoraalo magaca shirkadda isaga oo gudanayo hawl caadiya oo ganacsi oo shirkadu leedahay ama ganacsi ah nooca shirkadu qabato waxa uu qabanaya shirkadda, marka laga reebo hadii aan maareeyuhu wax awood ah u lahayn inuu ku metelo shirkadda arin gaar ah islamarkaana qofka uu la macaamilay uu ogyahay inaan maareeyahaasi lahayn awoodaas.

(2) Hadii qoraalka aasaaaska shirkadu ama qoraalka diiwaangelinta shirkad jirtaa dhigayo in maamulka shirkadda ay leeyihiin saamilaydu , Saamile kastaa waxay wakiil uga tahay shirkadda ganacsigeeda, ficil ay samayso Saamiluhu oo ay ku jirto ku soo saarista qoraalo magaca shirkadda isaga oo gudanaya hawl caadiya oo ganacsi oo shirkadu leedahay ama ganacsi ah nooca shirkadu qabato waxa uu qabanayaa shirkadda, marka laga reebo hadii aan Saamiluhu wax awood ah u lahayn inuu ku metelo shirkadda arin gaar ah islamarkaana qofka uu la maacaamilay uu ogyahay inaan Saamiluhu lahayn awoodaas.

## **Qodobka 40aad**
## **U cawil-celinta iyo u damaanad qaadida saamilayda iyo maareeyayaasha**

Shirkaddu waa inay u cawil-celisaa (reimburse) qofka ah ama hore uga ahaa Saamile ama maareeye lacag uu bixiyay isaga oo gudanayo hawsha caadiga ah ee ganacsiga shirkadda, waana inay uga damaanad qaadaa (indenify) qofka ah ama hore uga ahaa Saamile ama maareeye masuuliyadda uu galo (liabilities) qofku isaga oo gudanaya hawsha caadiga ah ee shirkadda ama

ilaalinta ganacsiga ama hantida shirkadda, hadii lacagtaas uu bixiyay ama masuuliyadaas uu galay iyada oo aan qofku jebin waajibka ka saaran shirkadda.

## CUTUBKA 7
## MAALIYADDA (FINANCE)

### Qodobka 41aad
### Qaabka isku darsiga (Form of Contribution)

(1) Waxa ay ku darsan karto (contribution) Saamiluhu shirkad waxa uu noqon karaa lacag, hanti, ama adeegyo la qabto ama qoraalka balan qaadka (Promissory Note), ama waajib kale oo ah inay ku darsato lacag ama hanti ama inay gudato adeegyo.

(2) Qof waxa laga dhigi karaa Saamile shirkadda ka tirsan islamarkaana uu heli karaa danta Saamile ee shirkadda isaga oo aan waxba ku darsan shirkadda ama aan lagu waajibin inuu wax ku darsado shirkadda.

(3) Hadii aan sidaas si ka duwan lagu sheegin xeer hoosaadka, qof waxa lagu dhigi karaa Saamile shirkadeed isaga oo aan helin danta Saamile ee shirkadda. Hadii aan sidaas si ka duwan lagu sheegn xeer hoosaadka, qof wuxuu noqon karaa Saamilaha keliya ee shirkad isaga oo aan waxba ku darsan (contribution) ama aan lagu waajibin inuu wax ku darsado shirkadda ama isaga oo an helin danta Saamile ee shirkadda.

### Qodobka 42aad.
### Masuuliyadda bixinta raasamaalka shirkada

(1) Shirkadu waxay waajib ugu leedahay Saamilaha inuu guto balan qaad kasta oo la fulin karo oo ku saabsan inuu ku darsado shirkadda lacag, hanti ama guto adeegyo, xitaa hadii Saamiluhu aanay awoodin in uu gudato sababta oo ah geeri, awood la'aan (disability) ama sabab kale. Hadii Saamiluhu bixin

waydo intii ay ku darsan lahayd shirkadda ee hantida ama adeegyda ah, Saamilaha waxa ku waajib ah iyada oo ay ikhtiyaarka leedahay shirkadu inay ku darstato shirkada lacag u dhiganta qiimaha ku qoran diiwaanada shirkadda ee uu waajibyay qodobka 41 in ay shirkadu yeelato, ee qaybta aanay bixin.

(2) Waajibka saaran Saamilaha ee inay bixiso inta uu ku darsan lahaa shirkadda ama inay soo celiso lacag ama hanti kale oo la bixiyay ama la qaybiyay si ka soo horjeedda Cutubkan waxa lagu dhaafi karaa oo keliya ogolaansho qoran oo ay sameeyeen dhamaan saamilayda shirkadu. Iyada oo aan waxba loo dhimayn dhaafidda, qof dayn ku leh shirkadda oo u bixiya dayntiisa ama sii uun kale u sameeya ficil isaga oo ku tiirsan waajibka asalka ah waxa uu fushan karaa waajibka asalka ah.

(3) Balanta uu ku qaaday Saamile in uu ku darsanayso wax shirkad ma noqon karo mid la fuliyo hadii aanu ahayn mid qoran oo ay saxeexday Saamiluhu

## Qodobka 43aad
## Wadaagsita faa'iidada iyo khasaaraha

Faa'iidada iyo qasaaraha shirkadda waxa loo qaybinayaa dhamaan saamilayda iyo xubno isku gunta (classes of members) iyada oo lagu salaynayo qiimaha ku dhigan diwaanka shirkada ee uu waajibiyay in la hayo qodobka 41, ee Saamile waliba ku darsatay shirkadda.

# CUTUBKA 8
# QAYBITNA IYO IS-CASILAADDA

## Qodobka 44aad
## Qaybinta ku meel gaadhk ah

Marka laga reebo sida ku dhigan cutubkan 7aad, Saamiluhu waxay xaq u leedahay inuu ka helo qaybin (distribution) shirkadda ka hor intaan Saamiluhu iska casilin shirkadda iyo ka hor kala diridda (dissolution)iyo dhamaynta iyo xisaabinta shirkadda (winding up) iyo waqtiga ama dhicitaanka xaalado lagu sheegay xeer

hoosaadka ama sidii kale ee ay ku heshiiyaan saamilayda oo dhan.

## Qodobka 45aad
## Is-casilaadda Saamilaha

Saamile wuu iska casili karaa shirkadda waqtiguu doono isaga oo siinaya ogaysiis saamilayda kale, balse hadii iscasilaadu jebinayso xeer-hoosaadka, waxayse shirkadu ku leedahay Saamilaha iscasilaysa qasaaraha ka dhasha jebinta xeer-hoosaadka iyo qarashka khasaaraha gaadha qadarka la siin lahaa hadii kale Saamilaha is casilaysa.

## Qodobka 46aad
## Xuquuqda Saamilaha is-casila

Saamilaha is casilaa xaq uma laha inuu ka qayb qaadato maamulka ganacsiga iyo hawlaha shirkadda, wuxuuna xaq u leedahay keliya inuu helo saamiga faa'iiadada ama wixii kale ee dakhli ahaan iyo dib ugu celin wuxuu ku darsatay shirkadda ah eeSaamiluhu xaq u yeelan lahayaa hadii anay Saamiluhu is casileen.

## Qodobka 47aad
## Reebanaata Qaybinta alaabta ah

Saamiluhu, iyada oo aan la eegayn nooca waxa ay ku darsatay shirkadda, xaq uma laha inuu codsado ama ka helo shirkadda nooc kasta oo qaybin (distribution) ah oo aan ahayn lacag. Saamilaha laguma qasbi karo inuu ka aqbasho qaybin hanti nooc kasta oo ay tahay shirkadda ilaa xadka in boqolayda hantida la siiyay Saamiluhu ay ka badan tahay boqolayda u dhiganta inta ay ku leedahay Saamiluhu shirkadda.

## Qodobka 48aad
## Xaqa qaybinta

Marka Saamiluhu xaq u yeesho inuu helo qaybin, Saamiluhu wuxu uu leedahay meeqaamka iyo dhamaan ciwadka (remedis) la siin laa qof ku leh dayn shirkadda ee qaybinta xuquuqda la siinayo saamilaha.

## Qodobka 49aad
## Reebanaanta qaybinta faa'iidada

(1) Shirkadu uma samayn karto qaybin saamilayda

hadii aan dhamaan masuuliyaadka shirkada oo aanay ku jirin masuuliyaadka saamilayda ee danahooda xubinimo iyo masuliyaadka daynle ee ku kooban hanti gaar ah oo shirkadu leedahay, aanu kabadan qiimaha raasa-maalka shirkada, marka laga reebo in qiimaha hantida daynku saaran yahay lagu daro raasa-maalka shirkada iyada oo qiimaha hantidaasi ka badan yahay daynta lagu leeyahay. Farqadan gudaheeda ereyga qaybin kuma jirto in la bixiyo iyada oo aan waxa labixinayaa aanu ka badnayn ama le-ekayn ama u dhigmin mag dhabid (compensation) ku filan adeegyada wakhtigaas ama kahor la gutay ama bixinta loo sameeyey iyada oo la gudanayo ganacsiga caadiga ah ee shirkada si waafaqsan qorshe hawl gab oo niyad sami ku dhisan ama barnaamujyo kale oo bisil ah (benefit programs).

**(2)** Saamilaha ku hela qaybin si kasoo hor jeeda sida farqada (1) ee qodobkan isla markana ogaa wakhtiga qaybinta in qaybintu jabinayso farqada (1) ee qodobkan wuxuu masuul kayahay qadarka loo qaybiyey. Saamilaha ku hela qaybin si ka soo hor jeeda farqada (1) ee qodobkan isla markaana aan ogayn marka la samaynayey qaybinta in qaynibtaasi jabinayso farqada (1) ee qodobkan kama aha masuul qadarka loo qaybiyey. Iyada oo la raacayo farqada (3) ee qodobkan, farqada (2) ma saamaynayso waajib ama masuuliyad saamilaha uu saaray heshiis ama sharci dhaqan gal ah qadarka la qaybiyey.

**(3)** Hadii aan si sidaas ka duwan lagu heshiin, saamilaha ka hela shirkada qaybin masuuliyadi ma saarna xeerkan gudihiisa ama xeer kale oo dhaqan gal ah qadarka loo qaybiyey kadib marka ay dhacdo mudo sadex sanno ah oo ka bilaabanta taariikhda qaybinta hadii aan dacwad dib loogaga soo celinayo saamilaha qaybintaas aan la bilaabin ka hor intaanay dhicin mudada sadexda sanno ah.

# CUTUBKA 9
# ISU-BIIRIDDA SHIRKADAHA

## Qodobka 50aad
## Isku-biiridda Shirkadaha

(1) Hal shirkad ama in ka badan ayaa ku biiri kara shirkad kale si waafaqsan qorshaha isku biiridda ee loo ansixiyay si waafaqsan Qodobka 54aad ee xeerkan

(2) Hal shirkad iyo in ka badan ayaa ku biiri kara Shirkad shisheeye oo la mid ah ama ka duwan Shirkadaha ku biiraya, hal ama in ka badan oo Shirkad shisheeye ah ayaa ku biiri kara shirkad si waafaqsan qorshaha isku biiridda ee loo ansixiyay si waafaqsanQodobka 54aad,

(3) Hadii isku biiridda aanu reebin xeerka shirkadda ama sharciga shirkada shisheeye islamarkaana shirkada shisheeye waafaqo dhamaan shuruudaha, hadii ay jiraan, ay dhigayaan xeerkiisa ama sharciga saamaynaya isku biiridda.

## Qodobka 51aad
## Qorshaha isku biirista

(1) Qorshaha isku biiridu waa inuu dhigaa:

(a) magaca shirkadda ama, hadii aan shirkadu lahayn magac shirkadeed, magaca saxda ah, ikhtisaaska sharciga lagu aaasaasay Shirkada, iyo qaabka shirkada mid kasta oo ka mid ah Shirkadaha isku biiraya

(b) Magaca shirkadda ama, hadii aan shirkadu lahayn magac shirkadeed, magaca saxda ah, ikhtisaaska sharciga lagu aasaasay Shirkada, iyo qaabka shirkada soo hadhaya (surviving entity) ee Shirkadaha isku biirayaa ay abuurayaan.

(c) Shuruudaha isku biiridda oo ay ku jirto hanaanka iyo qaabka ay ugu dhalan rogmayaan danaha mulkiilayaasha ee mid kasta oo ka mid ah Shirkadaha isku biiray danaha mulkiilayaasha ama waajibaadka ee shirkada soo hadhaya surviving entity) ama lacag ahaan ama hanti kale guud ahaan ama qayb ahaan,

(d) Hadii shirkada soo hadhayaa yahay shirkad, wax ka bedel kasta oo lagu sameeyey xeerka shirkadda ee shirkadda soo hadhay waxa saamaynaya isku biiriidda.

## Qodobka 52aad
## Ansixinta qorshaha isku-biiridda

[

(1) qorshaha isku biiridda waa in loo ansixiyaa:
   (a) si waafaqsan qodobada xeerka shirkadda ee la xidhiidha isku biiridda nooc kasta oo ay tahay, iyo Shirkadaha leh qaabkaas, ee lagu tilmaamay qorshaha isku biiridda
   (b) hadii aanay jirin qodobadaas, si waafaqsan qodobada xeerka shirkadda oo ay ku jiraan qodobada ugu adag ee ansixinta isku biiridda
   (c) hadii aanay jirin qodobadaasi, si waafaqsan qodobada sharciga ee la xidhiidha isku biiridda nocaas ah, iyo Shirkadaha qaabkaas ah, ee lagu tilmaamay qorshaha isku biiridda
   (d) Hadii aanay jirin qodobadaasi, si waafaqsan qodobada sharciga ee ay ku jiraan qodobada ugu adag ee ansixinta isku biiridda
   (e) Hadii midkoodna xeerka shirkadda iyo sharciga aanu si cad u sheegin ansixinta isku biiridda, si waafaqsan qodobada wax ka bedelka xeerka shirkadda ee ku dhigan sharciga iyo xeerka shirkadda
   (f) Hadii aan midkoodna xeerka shirkadda iyo sharciga aanu si cad u sheegin isku biirid ama ansixinta wax ka bedelka xeerka shirkadda, dhamaan saamilayda shirkadda

(2) Qodobkan dhexdiisa, qodobada sharciga iyo xeerka shirkadda ee lagu dabaqayo ansixinta qorshaha isku biiridda waxa ku jira qodobada la xidhiidha ansixin hordhac ah oo ay sameeyaan maareeyayaasha oo u gudbinaya Maaliyada ogaysiis, kooram, codayn, iyo ogolaanshaha saamilayda ama cid sadexaad. Xigashada qodobkani xigtay qodobada ugu adag ee

xeerka shirkadda ama sharciga waa xigasho qodobada xeerka shirkadda ama sharciga ee dhigaya shuruudaha codbixineed ee ugu sareeya ee ansixinta isku biiridda. Wax ku jira qodobkan looma qaadan karo inay ogolaanayaan inay xeerka shirkadda ku jirto qodobo isku biirid oo uu qeexay sharcigu

**Qodobka 53aad**
**Dhaqan-galka Isku Biirista**

(1) Marka isku biiridda loo ansixiyo si waafaqsan qodobka 51aad, hadii shirkada ama shirkadahu ay yihiin kuwo qoraalkooda aasaasku ama qoraalka diiwaangelinta shirkad jirta uu ka diiwaangashan yahay Diwaan- hayaha shirkada soo hadhay, waa inuu u gudbiyaa Diiwaan-hayaha si waafaqsan cutubka 12aad ee Xeerkan qoraalka isku biiridda oo dhigaya:

(a) magaca shirkadda ama, hadii aan shirkadu lahayn magac shirkadeed, magaca saxda ah ee Shirkadaha isku biiray, cinwaanka xafiiska guud, ikhtisaaska xeerka lagu aasaasay, iyo qaabka Shirkada
(b) magaca shirkadda ama, hadii aan shirkadu lahayn magac shirkadeed, magaca saxda ah ee shirkada hadhaysa, cinwaanka xafiiska guud, ikhtisaaska xeerka lagu aasaasay, iyo qaabka Shirkada
(c) in Shirkadaha isku biray ay digorogteen shirkada hadhaysa
(d) wixii kasta ee kale ee la xidhiidha isku biiridda ee shirkada hadhaysaa u arko in lagu daro

(2) hadii shirkada hadhaysaa yahay shirkad islamarkaana qorshaha isku biiridu dhigayo in wax laga bedelo qoraalada shirakdda ee la diiwaangeliyay ee shirkadda hadhaysa, qoraalka wax ka bedelka ee ku haboon ama qoraal kale oo dhigaya wax ka bedelka waa in loo soo gudbiyaa Diiwaan-hayaha si uu u diwaangeliyo si waafaqsa cutubka 12aad ee Xeerkan

(3) kadib marka loo ansixiyo isku biiridda si waafaqsan qodobka 52, hadii Shirkadaha isku biiriyaa aanay ahayn kuwa qoraaladooda aasaasku ama qoraalka

diiwaangelinta shirkad jirta ay ka diiwaangashan yihiin Diwaan -hayaha, shirkada hadhaysaa waa inuu u soo gudbiyaa Diiwaan-hayaha si loogu diwaangeliyo si waafaqsan cutubka 12aad ee Xeerkan, qoraalka isku biiridda oo dhigaya:

(a) magaca saxda ah ee Shirkadaha isku biiray, xafiiska guud, ikhtisaaska sharciga lagu aasaasay, iyo qaabka Shirkada

(b) magaca shirkadeed ee shirkada hadhaysa iyo cinwaanka guud

(c) in Shirkad kasta oo wax ku biiray uu u digo rogtay shirkada soo hadhay

(d) arin kii kasta ee kale ee la xidhiidha isku biiridda ee shirkada soo hadhay go'aansado inuu ku daro

(4) hadii qorshaha isku biiridu dhigyo in wax ka bedel lagu sameeyo qoraal loo diiwaangeliyay shirkadda soo hadhaysa, shirkadda soo hadhaysa waa inay keentaa qoraal wax ka bedel oo ku haboon ama qoraalada kale ee saamaynaya wax ka bedelka waa in loo gudbiyaa Diiwaan-hayaha is uu u diiwaangeliyo si waafaqsan cutubka 12aad ee Xeerkan

(5) Isku biiridu waxay dhaqan gal u noqonayaa sida uu cayimay sharcigu. Hadii sharcigu aanu cayimin taariikhda dhaqangalka, isku biiridu waxay dhaqangelay waqtiga iyo taariikhda qoraalka isku biiridu u dhaqangalo si waafaqsan qodobka 87

## Qodobka 54aad

## Raadka isku biiridda

(1) Marka isku biiridu dhaqangasho

(a) Mid kasta oo ka mid ah Shirkadaha isku biiray waxa uu ka mid noqonayaa shirkada soo hadhaysa jiritaankiisa gaarka ahina waa dhamaanaya. Dhamaan xuquuqaha, mudnaanaha (previleges), iyo awoodaha mid kasta oo ka mid ah Shirkadaha isku biiray, dhamaan hantida Shirkadahaas, iyo dhamaan waajibaadka saaran mid kasta oo ka mid ah Shirkadahaas isku biiray, iyo sidoo kale ashyaada

Shirkadaha isku biiray, waxa iska leh sharci ahaan shirkada soo hadhaysa waana xuquuqda, mudnaanaha, awoodaha, hantida iyo waajibaadka shirkada soo hadhay. La haanshaha hanti Shirkadaha isku biiray uma noqon karto mulkiilihii hore, waxyeelona uma gaysan karto lahaanshahaas isku biiridu; marka laga reebo in dhamaan xuquuqaadka daynlayaasha iyo dayn kasta oo lagu leeyahay hanti ay leedahay mid kasta oo ka mid ah Shirkadaha wax ku biiraya waxba ma yeelayso isku biiridu islahantidaas si kasto oo loo hayo. Dhamaan waajibaadka saaran mid ka mid ah Shirkadaha isku biiray waxa uu u wareegayaa shirkada soo hadhay waxana loogu fulin karaa si buuxda shirkada soo hadhay. Isku biiridu uma dhiganto wareejin ama igmasho. Qodobkani ma saamayn karo ansax ahaanshaha (validity) qodobo heshiis ama dib u celin mulkiyad hanti ama qaabab kale oo xadidaad ah (limitations) oo si gaar ah ula socda shuruudaha ama cawaaqibka ka dhasha isku biiridda.

(b) Mulkiilaha uu saaran yahay waajib ay ku leedahay mid ka mid ah Shirkadaha isku biiray sababta oo ah mulkiilanimadiisa shirkada wax ku biiray awgeed, balse aanay si kale dusha uga saarnaateen waajib uu leeyahay shirkada soo hadhay, waajibkaasi ay ku leedahay shirkada wax ku biiray uu galay ka hor isku biiridu wuu saarnaanaya hadii aan heshiis ka hadlaya waajibka aanu dhigin si sidaas ka soo horjeedda.

(c) Hadii aan si sidaas ka duwan aan lagu sheegin xeerka shirkadda ama sharci waajibin, Shirkad wax ku biiraya loogama baahna inuu ku sameeyo dhamayn iyo xisaabin ganacsigiisa (to wind up) ama inuu guto waajib, qaybiyona hanti, islamarkaana isku biiriddana laga ma soo qaadi karo inuu u dhigmo kala dirid ama lacagaynta (liquidation) shirkada wax ku biiray.

(d)Hadii aan si sidaas ka duwan lagu sheegin xeerka shirkadda ama sharci waajibin, waxii loo siiyo lacag ahaan ama shay ahaan mulkiilayaasha Shirkadaha isku biiraya si waafaqsan qorshaha isku biiridda lagama soo qaadayo inay u dhiganto qaybin faa'iido (dividend), qaybin hanti la lacageeyey (liquidating distrubtuion), ama qaybin kale oo keenta inay dhalato xuquuq qaybin oo ku dhisan heshiis oo mudnaan gaar ah leh

**Qodobka 55aad**
**Shirkad shisheeye oo ka soo hadhaya isku biiridda**

(1) Hadii ay isku biirayaan hal ama in ka badan oo shirkad wadani ah iyo Shirkad shisheeye taas shirkada shisheeye uu yahay shirkada soo hadhaysa, shirkada shisheeye:

(a) waa inay magacaabataa qof si uu u qabto adeeg dhegaysi lagu fulinayo waajib ama xaquuq mulkiilayaasha laga cod batay (dissenting owners) ee shirkad dhinac ka ah isku biirid ama dhegaysi ku salaysan dacwad ka dhalatay arin la xidhiidha shirkad dhinac ka ah isku biiridda.

(b) Waa inay sida ugu dhaqsaha badan u siisaa mulkiilayaasha laga cod batay ee shirkad dhinac ka ah isku biirid qadarka, hadii uu jiro, uu xaqa u siiiyay sharci

(c) Waa inay raacdaa dhamaan shuruucda ka dhaqan galka ah Jamhuuriyadda Somaliland ee la xidhiidha macaamilka ganacsi ee Shirkad shisheeye ahi ka sameeyo Jamhuuriyadda Somaliland hadii ay doonayso inay ka qabato ganacsi ama hawl Jamhuuriyadda Somaliland.

**Qodobka 56aad**
**Xuquuqda Saamilayda laga cod batay (Dissenters' rights), iyo shuruudaha isku biirista.**

(1) Ilaa xadka sharcigu uu si cad u reebay ama u dabray

xuquuqda uu Shirkad u leeyahay inuu ku biro Shirkad kale, uuna siiyo mulkiilayaasha laga cod batay xuquuq la xidhiidha isku biiridaas, ama uu ku soo rogo shuruudo isku biiridaas, isku biirid kasta oo uu sameeyo Shirkadaasi si waafaqsan cutubkan waa inuu waafaqaa dabarka (restriction), uuna siiyaa mulkiilayaashisa xaqa mulkiilayaasha laga cod batay, islamarkaana uu raacaa shuruudahaas.

(2) hadii aan si sidaas ka duwan lagu sheegin qorshaha isku biiridda, hadii Shirkad uu ku biiro nooc kale oo Shirkad ah oo ku jira ganacsi oo xuquuqda mulkiilayaasha laga cod batay la dabaqayo, mulkiilaha shirkada wax ku biiray ee ogolaada isku biiridu ama aan ogolaan isku biiridda ee aan isticmaalin xuquuqda mulkiilayaasha laga cod batay (dissenter's rights) wuxuu noqonaya mulkiile shirkada soo hadhay waxana laga soo qaadaya inuu dhinac ka yahay, uuna qabanayo, qoraalka hawlgelinta ee shirkada soo hadhay.

## QAYBTA 3

## CUTUBKA10
## KALA DIRIDDA

### XUBINTA 1
### KALA DIRIDDA IKHTIYAARIGA AH

#### Qodobka 57aad.
#### Kala Diridda Iyo Waqtiga Kala Diridda

(1) Shirkad waxaa lagu kala diri karaa:
- (a) hadii ay ku heshiiyaan in la kala diro shirkadda dhamaan Saamilaydu
- (b) marka la gaadho waqtiga ama dhacdo lagu sheegay xeer-hoosaadka
- (c) hadii ay shirkadu noqoto bilaa saamilay ka hor:
  - (I) maalinta kow iyo sagaashanaad kadib marka shirkadu noqoto bilaa Saamile hadii aan ka hor taariikhdaas aan qof laga dhigin Saamile
  - (II) taariikhda qoraalka kala diridda shirkadu

uu noqdo dhaqan gal si waafaqsan qodobka 87aad

**Qodobka 58aad.**
**Qoraalka kala diridda iyo ogaanshaha kala diridda**

(1) Marka la kala dirayo shirkad, shirkadu waa inay u soo gudbisaa Diiwaan-hayaha iyada oo u diwaangelinaysa si waafaqsan cutubka 12aad ee Xeerkan, qoraalka kala diridda shirkadda oo sheegaya:
- (a) magaca shirkadeed ee wadaniga ah ee shirkadda
- (b) cinwaanka xafiiska guud ee shirkadda
- (c) in shirkadaas la kala diray si waafaqsan qodobka 59aad

(2) Qodobada 42aadiyo 56aad dhexdooda, qof aan ahayn maareeye ama Saamile waxa laga soo qaadayaa inuu ogaaday kala diriidda shirkadda ka hor
- (a) maalinta sagashanaad kadib marka qoraalka kala diridda shirkadda la geliyo diiwaanada Diwaanada Diwaan - hayaha; ama
- (b) taariikhda qofkaasi uu u yeeshay ogaansho sax ah kala diridda shirkadda

**Qodobka 59aad**
**Raadka kala diridda**

(1) Shirkad la kala diray waxay u sii jiri kartaa shirkad ahaan balse ma qaban karto wax shaqo ah marka laga reebo wixii daruuri u ah si loo sameeyo dhamayn iyo xisaabin (wind up) iyo lacagaynta ganacsigeeda iyo hawleheeda, taas oo ay ku jirto:
- (a) inay urursato hantideeda
- (b) inay iska basriso alaabteeda aan loo qaybinayn saamilayda
- (c) inay iska gudo ama ay samayso talaabooyin ay iskaga gudayso masuuliyad saaran (liabilities)
- (d) inay u qaybiso hantideeda hadhsan Saamilayda;
- (e) inay samayso ficil kasta oo kale oo daruuri u ah dhamaynta iyo xisaabinta, iyo lacagaynta (liquidate) iyo hawleheeda

(2) Shirkada la kala diray way joojin karta dacwadaha ka

dhanka ah iyada oo raacaysa qodobada 70aad iyo 71aad.

**Qodobka 60aad**

**Xaqa dhamaynta iyo xisaabinta ganacsiga shirkadda.**

(1) kadib marka la kala diro, maareeye ama, hadii aanu jirin maareeye, Saamile ayaa dhamayn kara oo xisaabin kara (wind up) ganacsiga shirkadda, balse marka codsi u soo gudbiso Saamile, wakiilka sharci ee Saamile ama cid ay Saamile igmatay ama u wareejisay (shareholder's assignee or transferee), maxkamadu asbaab sax ah awgood waxay amri kartaa dhamaynta iyo xisaabin garsoorku kormeero (judicial supervision of the winding up.)

(2) Wakiilka sharci, igmanaha ama loo wareejiyaha uu igmaday ama u wareejiyey SaamilIhii u danbayey wuu samayn karaa dhamayn iyo xisaabin (wind up) ganacsiga shirkadda hadii shirkadda la kala diray.

**Qodobka 61aad.**

**Awoodda maareeyaha iyo Saamilaha kadib kala diriidda shirkadda**

(1) iyada oo la raacayo qodobka 58aad shirkadda waxa qabanaya ficilada ay sameeyaan maareeyayaasheedu ama marka qoraalka aasaasku ama qoraalka diiwaangelinta shirkad jirtaa sheegayo in maamulka ay leeyihiin Saamilaydu ficilka saamilaha kadib marka la kala diro shirkadda, ficilkaas oo:
   (a) ku haboon dhamaynta iyo xisaabinta ganacsiga shirkadda
   (b) qaban lahaa shirkadda si waafaqsan qodobka 38aad ka hor kala diridda shirkadda, hadii dhinaca kale ee lala macaamilay aanu ogayn kala diridda shirkadda

## XUBINTA 2
## KALA DIRIIDDA GARSOORKA AH

### Qodobka 62aad.
### Kala diridda garsoorka ah

1. Shirkad waxa lagu kala diri karaa dacwad uu ku soo oogay Xeer-ilaaliyaha Guud hadii:
   a) Shirakada ay ku heshay qoraalkeeda aasaaska ama qoraalka diiwaangelinta shirkad ku jirta khiyaamo (fraud) ama
   b) Shirkadu ay sii wado inay dhaafto ama ku xadgudubto awoodda uu siiyay xeer
2. Shirkad waxa lagu kala diri karaa dacwad uu oogtay Saamile ama maareeye shirkadda ka tirsan hadii ay cadaato in aanay macquul ahayn in loo sii wado ganacsiga shirkadda si waafaqsan xeer hoosaadka shirkadda
3. Shirkad waxa lagu kala diri karaa dacwad uu soo oogo qof amaah ku leh shirkadda hadii ay cadaato:
   a) In sheegashada daynluhu ay ku qoran tahay xukun, fulinta xukunkuna ay suuroobi wayday shirkaduna ay tahay mid kacday (musalaftay)
   b) Hadii shirkadu kacdo ayna qoraal ku qirato in sheegashada daynluhu ay tahay mid sax ah oo lagu leeyahay
4. Hadii
   a) Shirkadda loo kala diray si ikhtiyaar ah (voluntary) sida ku cad qaybta 1aad ee cutubkan
      I. shirkadu waxay soo gudbin kartaa dacwadda dhamaynta iyo xisaabinta, iyo lacagaynta ganacsigeeda iyo hawleheeda iyada oo garsoorku kormeerayo (judicial supervision) si waafaqsan qodobka 60aad
      II. Xeer-ilaaliyaha Guud, Saamile, maareeye ama daynle hadba kay tahay wuxuu soo oogi karaa dacwadda dhamaynta iyo xisaabinta, iyo lacagaynta ganacsiga iyo hawlaha shirkadda iyada oo garsoorku kormeerayo si waafaqsan qodobka 60aad marka la helo sababaha loo

dhigay qofkaas ee ku dhigan farqadaha (1) ilaa (3) ee qodobkan

b) Sida ku dhigan qodobada 63aad ilaa 65aad, "dacwad garsoor oo loo soo oogay si loo kala diro shirkad" waxa ku jira dacwad loo soo oogay si waafaqsan farqada (4) ee qodobkan "qaraarka kala diridda shirkad (decree of dissolution)" waxa ku jira amarka maxkamadda ee loo geliyay garmaqalka dacwadda si waafaqsan farqadda (4) ee qodobkan amraya in ganacsiga iyo hawlaha shirkad lagu sameeyo dhamayn iyo xisaabin, iyo lacagaynta iyada oo uu kormeerayo garsoorku

## Qodobka 63aad.
## Habka Kala Diridda Garsoorka Ah

**(1)** Dacwadda kala diridda shirkad ee uu soo oogo Xeer-ilaaliyaha Guud waxa loo gudbinayaa Maxkamadda Gobolka ee gobolka xafiiska guud ee shirkadu ku yaal ama, hadii aanay shirkadu ku lahayn Somaliland xafiis guud Maxkamadda Gobolka Hargeysa. Dacwadda kala diridda shirkad ee uu soo oogo dhinac ku xusan qodobka 64aad waxa loo gudbinaya Maxkamadda Gobolka ee gobolka xafiiska guud ee shirkadu ku yaal ama, hadii aanay shirkadu ku lahayn Somaliland xafiis guud Somaliland Maxkamadda Gobolka Hargeysa.

(2) Daruuri maaha in maareeyayaasha iyo saamilayda la horgeeyo dacwad kala dirid shirkadeed si loo kala diro shirkad hadii aan iyaga shaqsi ahaan dacwadda loogu soo oogin.

(3) Maxkamadda dacwad kala dirid shirkad laga hor oogay waxay soo saari kartaa go'aano hordhac ah (injunctions), magacaabi kartaa gudoome ama ilaaliye leh awoodo islamarkaana ay saaran yihiin waajibka ay amarto maxkamadu, waxay sido kale qaadan kartaa talaabooyinka kale ee loogu baahan yahay in la ilaaliyo hantida shirkadda meel kasta oo ay taal, islamarkaana

ay sii wadato ganacsigeeda shirkadu ilaa dhegaysi buuxa la qabanayo

## Qodobka 64aad.
## Gudoomidda Ama Ilaalinta

(1) Maxkamadda qaadaysa dacwadda lagu kala dirayo shirkad waxay magacaabi karta hal gudoome (receiver) ama in ka badan si loo dhameeyo islamarkaana loo lacageeyo, ama hal ilaaliye (custodian) ama in kabadan si uu u maareeyo ganacsiga iyo hawlaha shirkadda. Maxkamadadu ka hor intanay magaacibin gudoomaha ama ilaaliyaha (receiver or custodian) waa inay qabataa dhegaysi, kadib marka ay gaadhsiiso dhamaan dhinacyada dacwadda iyo cid kasta oo dan ku leh oo maxkamadu go'amiso. Maxkamadda magacaabaysa gudoomiyaha ama ilaaliyaha oo keliya ayaa Awood u leh shirkadda iyo dhamaan hantideeda meel kasta oo ay taal.

(2) Maxkamadu waxay u magacaabi kartaa qof **dabiici** ah ama **Shirkad**wadani ah gudoome ama ilaaliye. Maxkamadu waxay awood u leedahay inay ka dhigto gudoomaha ama ilaaliyaha damaanad (bond) ah qadar Maxkamadu xadido.

(3) Maxkamadu waa inay ku qeexdo awoodaha iyo waajibaadka gudoomaha ama ilaaliyaha amarka ay ku magacaabayso, iyada oo hadba wax ka bedeli karta. Awoodahaas waxa ka mid ah:

(a) In gudoomuhu:

(I) hadii ay ogolaato maxkamadu, uu si furan ama gaar ah u iibin karo qayb ama dhamaan hantida shirkadda meel kasta oo ay taal

(II) Isaga oo adeegsanaya magaca ah gudoomaha shirkadda inuu uga furi karo maxkamad dacwad kana difaaci karo dacwad shirkadda

(b) Ilaaliyaha, ka haysta ogolaanshaha maareeyaha shirkadda qoraalkeeda aasaasku ama qoraalka diiwaangelinta shirkad jirtaa dhigayo in ay maamulaan maareeyaayal, waxa uu isticmaalayaa

dhamaan awoodaha shirkadda, isaga oo sii maraya ama ay jogaan maareeyayaasha ama saamilayudu, ilaa xadka daruuri u ah u maareeynta hawlaha shirkadda sida ugu wanaagsan ee ilaalinaysa danta saamilaha iyo daynlayaasha
(4) Maxkamadu waxay gudoomaha ka dhigi kartaa ilaaliye, sidoo kale waxay ilaaliyaha ka dhigi kartaa gudoome, hadii sidaas dani ugu jirto shirkadda iyo Saamilayda iyo daynalayaasha
(5) Maxkamadu waxay hadba inta ay socoto hawsha gudoomaha ama ilaaliyuhu waxay amri kartaa in la magdhabo islamarkaana laga bixiyo qarashka uu galo ama geli doono gudoomaha ama ilaaliyuhu iyo qareenkiisu hantida shirkadda ama marka la iibiyo hantida

**Qodobka 65aad.**
**Qaraarka kala diridda**

(1) hadii, dacwad maxkameed oo loo soo oogay si loo kala diro shirkad, kadib dhegaysi maxkamadu go'aansato in mid ama in ka badan oo ah sababaha ku dhigan qodobka 64 ay jiraan, waxay soo saari kartaa qaraar lagu kala dirayo shirkadda iyada oo sheegaysa taariikhda dhaqangalka kala diridda shirkadda, islamarkaana kaaliyaha maxkamadu waa inuu gaadhsiiya nuqul qaraarka ah Diiwaanhayaha si uu u diiwaangeliyo si waafaqsan cutubka 14 ee Xeerkan.
(2) kadib marka ay gaadho maxkamaddu qaraarka kala diridda, maxkamadu waxay amraysaa in la sameeyo dhamaynta iyo xisaabinta (the winding up), iyo lacagaynta ganacsiga iyo hawlaha shirkadda si waafaqsan qodobka 61aad waxayna ogaysiis siinaysaa dacwoodayaasha si waafaqsan qodobada 70aad iyo 71aad.
(3) Qaraarada maxkamadda waa laga rafcaan qaadan karaa.

## XUBINTA 3
## KALA DIRIDDA SHIRKAD MARKA WAQTIGEEDU DHACO IYO KALA DIRIDDA SHIRKADDA TAHLI-WAAGA AH

### Qodobka 66aad
### Kala diridda shrikad xiligeedii oo dhacay awgeed

Shirkadu si toos ah (automatically) ayay u kala dirmaysaa marka ay dhacdo mudada ay jirayso, haday jirto mudo lagu sheegay qoraalkeeda aasaaska ama qoraalka diiwaangelinta shirkad jirta.

### Qodobka 67aad
### Kala diridda shirkad tahli-waaga ah

1. Hadii shirkad Talax-gab ahi ay ku guuldaraysato inay dawayso Talax-gabkeeda mudo sadex sano ama ka badan ah, maareeye kasta oo shirkadda ka tirsan ayaa kala diri karra shirkadda isaga oo uu soo gudbinaya diiwan hayaha, si uu ugu diiwaangeliyo qaab waafaqsan cutubka 12aad ee Xeerkan oo sheegaya.
   (a) Magaca shirkadda tahli-waaga ah
   (b) Cinwaanka xafiiska guud ee shirkadda
   (c) In shirkadu tahay mid tahli-waa ah oo ku guuldaraystay inay daweeyso tahliwaageeda mudo sadex sano ama ka badan ah
   (d) In, ugu yaraan sodon maalmood ka hor marka loo gudbiyo Diiwaanhayaha qoraalka kala diridda shirkadda tahli-waaga ah, shirkada tahli-waaga ahi ay ogaysiin qoraal ah ku gaadhsiisay qorshaha in shirkaddu ay diiwaangelinayso qoraalka kala diridda shirkadda tahli-waaga ah dhamaan mulkiilayaasha iyo dadka kale awooda u leh si waafaqsan sharciga iyo xeer hoosaadka shirkada inay kahor tagaan inshirkadda la kala diro islamarkaana shirkadda tahliwaaga ahi aanay soo gaadhin taariikhda loo gudibyay Diiwaanhayaha qoraalka kala diridda shirakadda, qoraal ay isku hortaagayaan tiro mulkiilayaal ah

iyo dad kale kala diridda shirkadda taas oo ku filaan karta in laga hortago kala dirid ikhtiyaari ah shirkadda tahli-waaga ah si waafaqsan sharciga iyo xeer hoosaadkeeda.

2. Shirkad tahli-waa ahi waxay kala dirmaysaa taariikhda ay dhaqangal noqonayso kala diridu ee ku dhigan qoraalka kala diridda shirkadda.

**Qodobka 68aad**
**Saamaynta kala diridda waafaqsan qodobada 67aad ama 69aad**

Shirkad loo kala diray si waafaqsan qodobka 67aad ama 68aad-way sii jiraysaa balse ma qaban karto wax ganacsi ah marka laga reebo wixii ku haboon in lagu sameeyo dhamayn iyo kala dirid (wind up), iyo lacagayn (liquidate) ganacsigeeda iyo hawleheeda islamarkaana lagu siinayo ogaysiis dacwoodayaasha si waafaqsan sharicga.

## XUBINTA 4
## OGAYSIINTA DAYNLAYAASHA SHIRKADDA LAKALA DIRAY IYO FULINTA DACWADAHA KA DHANKA AH SHIRKADDA LAKALA DIRAY

**Qodobka 69aad.**
**Joojinta dacwad iyada oo ogaysiis la bixinayo**

1. Shirkad lakala diray waxay joojin kartaa dacwadaha ka dhanka ah iyada oo raacaysa habka ku dhigan qodobkan.
2. Shirkad la kala diray waxay ugu gudbin kartaa ogaysiis qoraal ah si waafaqsan farqadan qof kasta waqti kasta ama kadib taariikhda dhaqangalka kala diridda. Ogaysiisku waa inuu sheegaa in, hadii aan si ka dhaqso badan aanu u xanibin xeer kale oo dacwadaha xadida, dacwad kasta oo qofku u qabo shirkadda lakala diray in ay gubanayso hadii aan dacwad lagu bilaabin xili kama danbays ah oo lagu sheego ogaysiiska, xiligaas kama danbaysta ah oo aan ka yaraan karin laba sano oo ka bilaabanta marka ogaysiiska la gaadhsiiyay. Ogaysiiska waxa ku jiri

kara xogtii kale ee shirkadda lakala diray go'aansato in lagu daro, oo ay ku jirto xog la xidhiidha habraaca fudaydinaya dacwada ka dhanka ah shirkadda lakala diray; marka laga reebo in waajibaad saaran dad dacwaynaya shirkadda la kala diray aan lagu soo rogi karin ama loo fasiran inanay sharci ahaan jirin.

3. Hadii aan si sidaas ka dhaqso badan xeer u xadidin, dacwadda qof ee ka dhanka ah shirkad lakala diray lama soo oogi karo hadii shirkadda lakala diray ay gaadhsiiso ogaysiiska kala diridda ee ku sheegan farqadda (2) islamarkaana aan wax dacwad ah aan la soo bilaabin xiliga kama danbaysta ah ee ku dhigan ogaysiiska.
4. Qodobkan dhexdiisa "dacwad" loogama jeedo masuuliyad ku xidhan dhacdo mustaqbal ah (a contingent liability) ama dacwad ku salaysan dhacdo dhacday kadib marka uu dhaqangalo kala diridu. Qodobkan gudihiisa, dacwad waxa ku jira u garqaadis (arbitration) ka dhashay heshiiska ku saabsan garqaadis la fulin karo (binding arbitration) oo ka dhexeeysa shirkadda la kala diray iyo qofka dacwoonaya iyo sidoo kale dacwad madani ah.

## Qodobka 70aad.
## Joojinta dacwad iyada oo la daabacayo

(1) Shirkad lakala diray waxay daabici kartaa ogaysiiska kala diridda, waxayna codsan kartaa in qofkii dacwad u qaba shirkadda lakala diray inuu u soo gudbisto si waafaqsan ogaysiiska

(2) Ogaysiiska lagu sheegay farqadda (1) ee qodobkan waa in:

(a) Lagu daabacaa hal mar wargeyska si baahsan loogu faafiyo aaga uu ku yaal ama ku ooli jiray xafiiska guud ee shirkadda laka la diray iyo faafinta rasmiga ah

(b) Uu sheegaa in, hadii aan xeer kale si ka dhaqso badan u xadidin dacwada soo oogidda, dacwad kasta oo loo qabo shirkadda lakala diray inay ku dhacayso shan sanadood gudohood oo ka bilaabanta marka ogaysiiska la daabacay ama afar bilood gudohood kadib marka dacwad la sheegto, mid kastaa ha danbeeyee. Ogaysiiska

waxa ku jiri kara xogta kale ee shirkadda lakala diray ay go'aansato inay ku darto, taas oo ay ku jirto xog la xidhiidha habraaca fudaydinaya furashada dacwadda ka dhanka ah shirkadda lakala diray; marka laga reebo inaan qof dacwaynaya shirkadda lakala diray la saari karin waajib aan sharciba dhigin.

(3) hadii shirkadda lakala diray ay u daabacdo ogaysiis si waafaqsan farqadda (2) ee qodobkan, hadii aan si waqtigaas ka horaysa aanay u joojin dacwadda qodobka 69 ama xeer kale, qofna kuma soo oogi karo dacwad shirkadda lakala diray hadii aan qofku ku soo oogin dacwadiisa shan sanadood gudohood laga bilaabo taariikhda la daabacay ogaysiiska ama afar bilood gudohood kadib marka dacwadda la sheegto, mid kasta ha danbeeyee.

(4) qodobkan dhexdiisa marka laga reebo marka la ogol yahay in la joojiyo si waafaqsan qodobka 70aad, "dacwad" waxa loola jeedaa dacwad kasta, oo aanay ku jirin dacwad ay sheeganayso Jamhuuriyadda Somaliland, ha noqoto mid la ogyahay, mid soo socota, mid taagan ama mid ku xidhan dhacdo mustaqbalka ah (contigent), mid lacagayn shirkad ah (liquidating), mid ku salaysan heshiis, gashi (tort) ama asbaab sharci oo kale. Qodobkan gudihiisa, dacwad waxa ku jira u garqaadis (arbitration) ka dhashay heshiis ku saabsan garqaadis la fulin karo (binding arbitration) oo ka dhexeeysa shirkadda la kala diray iyo qofka dacwoonaya iyo sidoo kale dacwad madani ah.

(5) Qodobkan lagu dabiqi maayo dacwadda ogaysiiska ay u gudbisay shirkad loo kala diray si waafaqsan qodobka 70aad.

## Qodobka 71aad.

## Fulinta dacwadaha ka dhanka ah shirkad lakala diray

(1) Dacwad waa lagu oogi karaa si waafaqsan qodobada 70aad ama 71aad: -

(a) Shirkadda lakala diray ee hantideeda aan la qaybin

(b) Hadii hantida lagu qimeeyay Deyn bax lacageed (liquidation), mulkiilaha shirkada lakala diray; marka

laga reebo in wadarta guud ee masuuliyadda (liability) dhamaan sheegashooyinka oo dhan ee ku dhigan qodobkan aanay ka badnaan qiimaha wadarta guud ee hantida uu qaybta u helay mulkiiluhu, qiimahaas oo ah ka la go'aamiyay markii la qaybinayay hantida. Mulkiile kasta oo looga baahan yahay inuu soo celiyo qiimaha qaybta uu ka helay hantida uu helay mulkiiluhu marka lagu qiimeeyo Deyn bax lacageed (liquidation) ka waxa uu xaq u leeyahay inay u qaadhaamaan dhamaan mulkiilayaasha kale (contribution). Qaadhaan kastaa waa inuu noqdaa mid waafaqsan xuquuqda iyo danaha mulkiilaha qaadhaanka bixinaya waana inaanay ka badnaan qiimaha hantida uu ku helay mulkiilaha qaadhaanka bixinaya lacagaynta ganacsiga shirkada (liquidation).

## CUTUBKA 11
## WAR-BIXIN SANADEEDKA

### Qodobka 72aad.
### Warbixin sanadeed

(1) Shirkad shisheeye kasta oo soo warbixinayaa waa inuu u soo gudbinaya diiwan hayaha, isaga oo u diiwaangelinaya qaab waafaqsan cutubka 12 ee Xeerkan, warbixin sanadeed sheegaya magaca shirkada iyo cinwaanka xafiiskiisa guud islamarkaana tilmaamaysa waxqabadka ama waxqabadyada ay fulisay shirkadu iyada oo u isticmaalaysa fure ama furayaal istilmaame (self-classification code or codes) hanaanka uu ku tilmaamay Wasiirka Ganacsigu xeer-nidaamiye

(2) (a) shirkada warbixinaysaa waa inay u soo gudbisaa warbixin sanadeedkeeda u horeeya Diiwaanhayaha si waafaqsan cutubka 12 ee Xeerkan ugu danbayn maalinta u danbaysa ee bisha tuse taariikheedka ka danbeeysa sanad guurada koowaad ee sanad tuse taariikheedka qoraalka aasaasidda shirkadda, qoraalka diwaangelinta shirkadda jirta ama qoraalka diiwaangelinta Shirkad shisheeye oo jira ee

warbixinaya uu noqday dhaqangal ama, marka shirkadu yahay mid dib u soo ceshaday ama dawayyay tahli-waa, ugu danbayn maalinta u danbaysa ee bisha labaad ee tuse taariikheedka ka danbeeya sanad guurada kowaad ee bisha tuse taariikheedka dib u sooceshiga ama dawaynta tahli-waageedu dhacday. Markaas dabadeed, warbixin sanadeedka Shirkad kasta oo warbixineed waa in la soo gudbiyaa sanad kasta.

a) Xogta ku jirta warbixin sanadeedku waa inay noqotaa mid cusub oo ka hadlaysa taariikhda warbixin sanadeedku loo soo gudbiyay diiwan-hayaha si waafaqsan cutubka 12aad ee Xeerkan. Warbixin sanadeedku ma sheegi karto taariikhda dhaqangalka oo dib dhacsan.

(3) Shirkad kasta oo warbixinayaa oo ku guuldaraysata ama diida inuu u soo gudbiyo Diiwaanhayaha warbixin si loo diiwaangeliyo ama isku diiwaangelin wayda ka hor taariikhda ku tilmaaman farqadda (2) ee qodobkan islamarkaana bixin wayda khidmadda hawl qabadka (processing fee) waxa lagu qaadayaa ciqaab loo goaaminayo islamarkaana loo qaadayo si waafaqsan qodobka 87 shirkadaasina ma sii ahaanayo Shirkad jiritaan haboon leh (good standing).

## CUTUBKA 12
## TAHLI-WAA (DELINQUENCY)

### <u>Qodobka 73aad</u>
### <u>Sababaha tahli-waaga</u>

(1) Shirkad wadani ahi waxay noqon karaa tahli-waa (delinquent) si waafaqsan qodobka 76 hadii aanu:

(a) Bixin khidmad ama ciqaab uu ku soo rogay Xeerkani marka ay waajibto; ama

(b) Waafiqin cutubka 10aad ee Xeerkan ee dhigaya warbixinaha Shirkadaha warbixinaya

(1) Shirkad shisheeye oo ah Shirkad warbixinaysa

waxay noqon kartaa mid tahli-waa ah si waafaqsan 74 hadii;

(a) aanu bixin wax khidmad ah ama ganaax uu ku soo rogay xeerkani markii uu ku waajibay

(b) aanu waafiqin cutubka 11aad ee xeerkan oo dhigaya warbixinada ay samaynayaan Shirkadaha warbixinaya

(c) aanu u keenin diiwaan- hayaha, si uu ugu diiwaangeliyo si waafaqsan cutubka 12aad ee xeerkan, qoraal ku haboon oo wax ka bedel ah (change) marka ay daruuri tahay in laga dhigo qoraalka ogolaanshaha lagu siiyay shirkada shisheeye mid dhamaantii sax ah

(d) Diiwaan-hayahu ka helo shahaado si buuxda loo hubiyay run ahaansheheeda sarkaal ay gacanta ugu jirto diiwaanada shirkada ee dalka lagu aasaasay shirkada shisheeye, taas oo sheegaysa in shirkadu aanu jirin natiijo ka dhalatay kala dirid ama isku biirid ama si kaleba awgeed

## Qodobka 74aad
## Tahli-waaga

(1) Hadii diiwaan-hayuhu go'aansado in ay jirto mid ama in kabadan sababaha ku dhigan qodobkan 75 ee ay ku noqoto Shirkad tahli-waa ah (delinquent company) islamarkaana shirkadu aanay sixin mid kasta oo ka mid ah sababahaas ama ay u cadayn waydo si macquul ah oo uu ku qanci karo diiwaan-hayuhu in aanay jirin sababahaasi mudo lixdan cisho gudohood ah kadib marka diiwan-hayahu uu qaatay go'aankaas, shirkadu waxay noqonaysaa tahli-waa kadib marka ay dhamaato lixdanka cisho.

(2) Shirkad jirtaa iyo Shirkad shisheeye oo jirtaa waxay islamarkaba noqotaa tahli-waa hadii diiwaan-hayuhu uu go'aamiyo inay ku guuldaraysatay inay u keento qoraalka diiwaangelinta shirkad jirta ama qoraalka ogolaansho siinta Shirkad shisheeye oo jira, hadkba kay tahay, diiwaan-hayuha, si uu ugu diiwaangeliyo si waafaqsan cutubka 12aad ee xeerkan, sodon maalmood gudohood laga bilaabo taariikhda xeerkani

dhaqangalo.

## Qodobka 75aad.

## Saamaynta tahli-waaga

(1) Shirkad tahli-waa ahi dacwad kama wadi karto maxkamad ku taal Jamhuuriyadda Somaliland si ay u soo urursato dayn ama waajibaad u fuliso ilaa ay dawayso tahli-waga si waafaqsan qodobka 77 (1), (2),

(2) Maxkamadi waxay sii wadi kartaa dacwad ay soo oogtay Shirkad ilaa ay go'aamiso in shirkadu tahay tahli-waa. Hadii maxkamadu go'aamiso in shirkadu ay tahay tahli-waa, way hakin kartaa dacwad ilaa shirkadu ay daweyso tahli-waaga si waafaqsan 76. Hadii Shirkad tahli-waa ahi dawayso tahli-waaga si waafaqsan qodobka 76, dacwad ka socota maxkamada Jamhuuriyadda Somaliland ku taal oo shirkadaasi dhinac ka tahay looguma diidi karo in uu shirkadu mar ahayd tahli-waaya

(3) Jiritaanka shirkadu way sii soconaysaa iyada oo aan la eegayn tahli-waaga

(4) Shirkad tahli-waa ah waa lakala diri karaa mar kasta iyo hanaan kasta oo uu dhigay ama ogol yahay xeeka shirakdda ama sharcigu iyo, hadii ay ku guuldaraysato inay dawayso tahliwaaga, mudo sadex sano ama ka badan, shirakadda tahli-waa ah waa loo kala diri kara si waafaqsan qodobka 67

## Qodobka 76aad.

## Dawaynta tahli-waaga

1. Shirkad tahli-waa ahi waxay ku dawayn kartaa tahli-waageeda:
   a) marka ay tahay shirkad tahli-waa ah oo aan ahayn shirkad jirta ama Shirkad shisheeye oo jira oo u noqotay tahli-waa si waafaqsan farqadda (2) ee qodobka 74, iyada oo u soo gudbinaysa diiwaan-hayaha, si waafaqsan cutubka 14aa ee Xeerkan, qoraalka dawaynta tahli-waaga oo sheegaysa

cinwaanka xafiiska guud ee shirkadda iyo waxqabadka ama waxqabadyada ay fulisay shirkadu iyada oo u isticmaalaysa fure ama furayaal istilmaame (self-classification code or codes) hanaanka uu ku tilmaamay Wasiirka Ganacsigu xeer-nidaamiye.

b) marka ay tahay shirkad jirta ama Shirkad shisheeye oo jira oo tahli-waa ah oo u noqotay tahli-waa si waafaqsan farqadda (2) ee qodobka 74, iyada oo u soo gudbinaysa Diiwaanhayaha si waafaqsan cutubka 12aad ee xeerkan, qoraalka diiwaangelinta shirkad jirta ama qoraalka ogolaanshaha siisay Shirkad shisheeye oo jira, hadba midkay tahay, oo waafaqsan shuruudaha ku dhigan cutubka 14aad ee xeerkan

2. Si ay u dawayso tahli-waaga si waafaqsan farqadda (1) ee qodobkan, Shirkad shisheeye oo tahli-waa ah ama Shirkad shisheeye oo jira oo tahli-waa ah waxay ku dawayn kartaa tahli-waaga iyada oo u soo gudbinaysa diiwan-hayaha, si uu ugu diiwaangeliyo si waafaqsan cutubka 12aad ee xeerkan, qoraalka dib ula noqoshada Shirkad shisheeye.
3. shirkad tahli-waa ahi waxay ku dawayn kartaa tahli-waaga iyada oo lakala diro
4. Marka

a) laga reebo sida ku dhigan farqadda (3)(a) ee qodobkan, magac shirkadeedka ka dib marka la daweeyo tahli-waaga waa isla magac shirkadeedkii loo go'aamiyay si wafaqsan qodobka 16 ee shirkadda waqtiga ay dawayso tahli-waaga hadii magac shirkadeedkaasi waafaqo qodobka 16 waqtiga shirkadu ay dawaynayso tahli-waaga. Hadii magaca shirkadu aanu ka duwanayn mid ku jira diiwaanka Diiwaanhayaha sida ku cad qodobka 15, magac shirkadeedka shirkadda kadib markay ay dawayso tahli-waaga waxa uu noqonaya magac shirkadeedkaas oo lagu daray ereyga "tahli-waa la daweeyey" iyo bisha, taariikhda iyo sanadka uu dhaqangalayo qoraalka dawaynta tahli-waaga.

b) Shirkadu dawayso tahli-waaga si waafaqsan

farqadda (2) ee qodobkan, magac shirkadeedka shirkadu waa inuu noqdaa magac shirkadeedkeeda waqtiga ay dawayso tahli-waaga ee loo bedelay si waafaqsan qodobka 16, iyada oo aan loo raacayn qodobka 16

c) Marka ay tahay Shirkad shisheeye ama Shirkad shisheeye oo jira taas oo u dawaysay tahli-waaga si waafaqsan farqadda (2) ee qodobkan, magaca shirkada shisheeye waxa uu noqonayaa magaceedii hore ee waqtigii ay dawaysay tahli-waaga, iyada oo aan la eegayn qodobka 16, ee loo bedelay si waafaqsan qodobka 16

## Qodobka 77aad.
## Ka rafcaan qaadashada ku dhawaaqida tahli-waaga

1. shirkadu waxay uga rafcaan qaadan kartaa go'aanka ku xusan qodobka 74 ee ku tilmaama in ay tahay tahli-waa Maxkamadda Sare ee Somaliland sodon maalmood gudohood kadib taariikhda uu dhaqangalo tahli-waagu. Shirkadu waxay ku bilaabaysaa rafcaankaas iyada oo u qornay cabasho maxkamadda si ay u baabiiso tahli-waaga ama inay go'aamiso in shirkadu dawaysay tahli-waaga iyada oo nuqul ka mid ah cabashada loo gudbinayo Diiwaanhayaha si uu u diiwangeliyo diiwaanada Diiwaanhayaha ee ay khuseeyso

2. Maxkamadu si ku meel gaadh ah u amri kartaa Diiwaanhayaha inuu qabto talaabo kasta oo maxkamadu u aragto inay haboon tahay ama inay qaadato talaabo kasta oo ay maxkamadu u aragto inay haboon tahay

# CUTUBKA 13
# DIB U SOO CELINTA SHIRKAD LAKALA DIRAY

## Qodobka 78aad
## Dib u soo celinta kadib kala diridda

Shirkad la kala diray dib ayaa loo soo celin karaa si wafaqsan cutubka11aad

## Qodobka 79aad.
## Codka iyo Oglaanshaha loo baahan yahay iyo Raadka diidmada

(1) Shirkadda la kala diray waxa dib loogu soo celin karaa hadii ay buuxiso shuruudahan soo socda:

(a) Hadii codka yeelista ah ama ogolaanshaha laga helay mulkiilayaasha iyo dadka kale ee xaqa u leh inay codeeyaan ama ogolaansho bixiyaan waqtiga:

(I) loo baahan yahay si dib loogu soo celiyo si waafaqsan xeer hoosaad keeda

(II) Hadii xeer hoosaad keedu aanu sheegin codka ama ogolaanshaha loogu baahan yahay si dib loogu soo celiyo, ku filan in lagu sameeyo kala dirid si waafaqsan sharciga, ama codka ka badan ama ka yar ama ogolaanshaha loogu baahan yahay in lagu kala diro si waafaqsan xeer hoosaadka

(b) marka laga reebo wixii sidaas ka duwan ee lagu sheego xeer hoosaadka, mulkiilayaasha iyo dadka kale ee awood u leh sida ku cad sharciga iyo xeer hoosaadka si ay u soo gudbiyaan ama u joojiyaan kala diridda shirkadda aanay ka codayn, ka hor ama waqtiga codka ama ogolaanshaha looga baahan yahay farqadda (1)(a) ee qodobkan, xaqa inay ka codeeyaan dib u soo celinta ama inay u soo gubiyaan shirkadda qoraal ishortaag dib u soo celinta.

(c) marka shirkad lagu kala diray dacwad qasab ah ama garsoor oo ay soo oogeen mid ama in kabadan oo mulkiilayaasha ah, codayn haa ah ama ogolaanshaha mid kasta oo ka mid ah mulkiilayaashaas waa in la helaa waana in lagu daraa codka ama oglaanshaha uu u baahan yahay farqadda (1)(a) ee qodobkan

(d) marka shirkadda lagu kala diray dacwad ay soo oogeen mid ama in ka badan oo dad shirkada dayn ku leh, waajibka daynlayaashaasi ku leeyihiin shirkadda waa in la bixiyaa ama loo gutaa si buuxda

(e) marka shirkadda loo kala diray dacwad uu soo oogay Xeer-ilaaliyaha Guud, dhamaan sababaha kala diridda ee uu soo oogay Xeer-ilaaliyaha Guud waa in la

maareeyaa, islamarkaana Xeer-ilaaliyaha Guud waa inuu ogolaaday dib u soo celinta.

(2) Ilaa heerka qoraalka xeer hoosaadka ama sharcigu uu sheegay xuquuqda codaynta mulkiilayaasha ama dad kale ee isugu yeedhidda shir, ogaysiinta shir, ogolaanshaha iyo talaabooyinka mulkiilayaasha iyo dadka kale iyada oo aan shir la qaban, samaynta diiwangelinta taariikhda shirarka, ama arimaha kale ee khuseeya codaynta ama ogolaanshaha mulkiilayaasha ama dadka kale, axkaamtaas waa in lagu dhaqaa codynta iyo ogolaanshaha ku shardiyan farqadda (1)(a) ee arimaha la xidhiidha shirkadda iyo codaynta ama ishortaagga mulkilayaasha iyo dadka kale ee ku dhigan farqadda (1)(b) ee qodobkan.

## Qodobka 80aad
## Habka dib u soo celinta

(1) Si dib loogu soo celiyo shirkad si waafaqsan cutubkan, dib u soo celin waa in loo gudbiyaa diiwaan-hayaha si waafaqsan cutubka 11aad ee Xeerkan, taas oo sheegaysa:

(a) Magac shirkadeedka shirkadda

(b) Magac shirkadeedka shirkadu leedahay kadib dib u soo celinta, iyada oo ay shardi tahay in magacu waafaqo qodobka 81

(c) Taariikhda aasaaska ama diiwaangelinta shirkadda

(d) Taariikhda kala diridda shirkadda

(e) Qoraal sheegaya in dhamaan shuruudaha ku dhigan qodobkan in la raacay

(f) Cinwaanka xafiiska guud ee shirkadda Islamarkaana tilmaamaysa waxqabadka ama waxqabadyada ay fulisay shirkadu iyada oo u isticmaalaysa fure ama furayaal istilmaame (self-classification code or codes) hanaanka uu ku tilmaamay Wasiirka Ganacsigu xeer-nidaamiye

**Qodobka 81aad.**
**Magacashirkada dib loo soo celiyay**

Magac shirkadeedka shirkadda dib loo soo celiyaya waxa uu noqonaya ka loo bixiyo iyada oo la raacayo qodobka 15 shirkadda waqtiga dib u soo celinta, hadii magaca shirkadda wadaniga ahi yahay mid waafaqsan qodobka 16. Hadii magaca shirkada wadaniga ahi noqon waayo mid waafaqsan qodobka 16, magac shirkadeedka shirkada dib loo soo celiyay wuxuu noqonayaa magacaas shirkadeed oo la raaciyay ereyga ah "dib loo soo celiyay (reinstated)" iyo bisha, maalinta iyo taariikhda dhaqangalka dib u soo celinta.

**Qodobka 82aad.**
**Raadka dib u soo celinta**

(1) iyada oo la raacayo farqadda (2) ee qodobkan, marka la soo celiyo, jiritaanka shirkada waxa laga soo qaadayaa inuu weligii socday oo aan kala go' soo dhexgelin; shirkadu waxay dib u bilaabaysaa inay qabato ganacsigeeda ama hawleheeda sidii oo aan weligeed ba kala diriddu dhicin; dayn kasta, waajib kasta, ama masuuliyad (liability) kasta oo ay gashay shirkadu ama mulkiile ama maareeye shirkadda ka tirsan ka hor ama kadib kala diridda waxa loo go'aaminaya sidii oon weligeedba kala diriddu dhicin.
(2) Xuquuqaha mulkiilayaasha iyo dadka kale ee ka dhasha ku tiirsanaanta kala diridaas ka hor intaan dadkaasi ogaan dib u soo celinta saamayn taban kuma yaalen karto dib u soo celintaasi.

## CUTUBKA 14

## DIIWAANGELINTA QORAALADA IYO HAWLAHA MAAMULKA

**Qodobka 83aad.**
**Shuruudaha diiwaangelinta**

(1) (a) Qoraal kasta oo uu shardiyay ama ogolaaday in laga diiwaangeliyo Diiwaanhayaha qodob ka mid ah xeerkan waa inuu waafaqaa cutubkan 12aad.

(b) Si loogu diiwaangeliyo si waafaqsan cutukba 14aad, qoraalku waa inuu waafaqa shuruudaha ku dhigan qodobkan iyo shuruudaha kale ee kaabaya ama ka duwan cutukba 16aad ee Xeerkan ee ku dhigan xeer kale oo ay leedahay Jamhuuriyadda Somaliland

(c) Qodob ka mid ah Xeerkan oo dhigaya in qoraal laga diiwaangeliyo diiwaanada Diiwaanhayaha waxa loola jeedaa in loo soo gudbiyo qoraalkaas Diiwaanhayaha si uu ugu diiwangeliyo si waafaqsan cutubka 12aad ee Xeerkan

(2) iyada oo aan waxba loo dhimayn ictiraafka guud ee farqadda (1)(b) ee qodokban ee shuruudaha kale ee uu dhigayo xeer kale oo Somaliland leedahay ee wax ku daraya ama ka dhimaya shuruudaha ku dhigan qaybtan, iyo qodobada kale ee Xeerkan ama sharci kale oo Somaliland leedahay oo shardi ka dhigaya saxeex qoraal, saxeexaas loogama dhigi karo shardi in loo diiwaangeliyo qoraal si waafqsan cutubka 12aad.

(3) qoraalka waxa ku jiraya dhamaan xogtaa uu waajibiyay in laga helo xeer ka dhaqan gal ah Jamhuuriyadda Somaliland qoraalkaas, hadii aan si kale xeer jideeyna, laguma dari karo xog kale.

(4) qoraalku waa inuu noqdaa mid habka uu u qoran yahay uu aqbali karo diiwaan-hayuhu iyada oo abuuri karo qoraal ay ku jiraan dhamaaan xogta lagu qorayo qoraalka iyo farta lagu qorayo ama lagu daabacayo. Diiwaan-hayuhu wuxuu dejin karaa in qoraalka loogu soo gudbiyo hal hab ama habab ka badan iyo in loo soo mariyo hal marin keliya ama in ka badan. Diiwaan-hayuhu ma aqbalayo qoraal aan loogu soo gudbin habka iyo marinka uu dejiyay. Hadii diiwaan-hayaha ogolaado in qoraalka loogu soo gudbiyo waraaq, qoraalku waa inuu noqdaa mid daabacan (typewritten or machine printed), wuxuuna diiwaan-hayuhu soo cayimi karaa dhumucda, muuqaalka, tayada, midabka iyo daabacadda waraaqda iyo sida ay u eekanaayso (the format). Diiwaan-hayuhu wuxuu, isagoo ku tilmaamaya hanaan xeer-nidaamiye uu soo saaro Wasiirka Ganacsigu, ku soo rogi karaa shuroodo macquulo ah sifooyinka kale ee uu yeelanyo qoraalka loo soo gudbinayo elektoroooni ahaan.

Diiwaan-hayuhu waa inuu xaqiijiyaa inuu ka go'aan gaadho, waqtiga ugu horaysa ee ay ula muuqato suuragal, in qoraalka si waafaqsan cutubka 12aad loogu soo gudbiyo diiwaan-hayaha in loo soo gudbiyo elektorooni ahaan iyada oo aanay daruuri ahayn in gacanta looga soo geliyo nuqulka asalka ah (physical original document) ama sawirkiisa, hadii dhamaan xogta loo baahan yahay oo dhan la soo gudbiyay lagalana bixi karo xogta la soo gudbiyay. Hadii la ogolaado in qoraalka loo soo gudbiyo elektorooni ahaan si waafaqsan cutubka 12aad islamarkaan qoraalkaas loogu soo gudbiyo elektorooni ahaan, qoraaalkaas lama soo raacin karo qoraalo kale oo gacanta laga soo gudbiyay (physical) hadii aan diiwaan-hayuhu sidaas ku ogolaan hanaan ku tilmaaman xeer-nidaamiye uu soo saaro Wasiirka Ganacsigu.

(5) Qoraalku waxa lagu soo gudbin karaa af Soomaali ama Ingiriisi. Magaca shirkada ee ku qoran qoraalku qasab maaha inuu noqdo af Soomaali ama af Ingiriisi, waxuu noqon karaa Af Soomaali ama Ingiriis ama tiro.

(6) Qoraalku waa inuu sheegaa qodobka ama qodobada sharciga, aan ahayn cutubka 12aad ee Xeerkan, ee iyada oo laga duulayo loo soo gudbiyay qoraalka Diiwaanhayaha si uu u diiwaangeliyo si waafaqsan cutubka 12aad.

(7) Qoraalku waa inuu sheegaa magaca ama magacyada saxda ah, cinwaanka waraqaaha (mailind address (es) ee qofka ama saamilayda u soo gudbinaya qoraalka si loo diiwaangeliyo, balse qasab maaha in lagu sheego qoraalka magacayada iyo cinwaanda in ka badan hal qof.

(8) Qoraalka waa inay ku jirtaa foomka loo baahan yahay in la buuxiyo si waafaqsan qodobka 85.

(9) Qoraalka waa in loo gudbiyaa Diiwaanhayaha si uu u diiwaangeliyo waana in loo bixiyaa dhamaan khidmadaha hanaanka uu ku tilmaamo Wasiirka Ganacsigu xeer-nidaamiye

(10) Hadii qoraalka lagu gudbinayo qaab elektorooni ah, iyada oo aan waxba loo dhimayn xeerarka kale, hadii maalinta u danbaysa ee xiliga diiwaangelinta qoraalka ee ay ku eegtahay in lagu soo gudbiyo elektorooni ahaan ay

ku dhacdo Jimce ama maalin kale oo fasax ah ama maali xafiiska Wasiiirka Ganacsigu uu xidhan yahay, xiliga ay dhacayso soo gudbintu waxay ahaanaysaa maalintaas.

## Qodobka 84aad
## U gudbinta diiwaan-hayaha qoraalo si loo diiwaangeliyo

In si waafaqsan cutubka 12aad ee Xeerkan loogu soo gudbiyo qoraal Diiwaanhayaha waxay u dhigantaa ogolaanshaha ama ogaanshaha qof kasta oo soo gudbiya qoraalkaas, ciqaabta ka dhalan karta beensheegidda (under penalities of perjury), in qoraalkaasi uu yahay ficilka qofka soo gudbiyay, ama in qofku si niyad sami ah u aaminsan yahay in qoraalku uu yahay ficilka qofka uu isaga oo ka wakiil ah u soo gudbiyay si loo diiwaangeliyo, iyada oo la waafajinayo shuruudaha ku dhigan cutubka 12aad, xeerka shirkadda iyo sharciga, iyo in qofku si nayad sami ah u aamin san yahay xaqaa'iqa ku jira qoraalku inay yihiin run iyo in qoraalku uu buuxinayo shuruudaha ku dhigan cutubka 12aad, xeerka shirkadda iyo sharciga.

## Qodobka 85aad
## Foomamka iyo bixintooda

(1) Diiwan-hayuhu wuxuu u diyaarin karaa uuna bixin karaa foom ama xaashi jeldi ah (cover sheet) ama labadaba qoraal kasta oo waafaqsan cutubka 12aad islamarkaana wuxuu amri karaa isticmaalka foomka ama xaashi jeldiga ah (cover sheet) ama labadaba. Foomka ama xaashida jeldiga ah waxa ku jiri kara xog kasta oo diiwaan-hayuhu u arko inay ku haboon tahay isaga oo wasiirku ku soo saaraya xeer-nidaamiye si uu u guto waajib uu saaray sharci ka dhaqangal ah Jamhuuriyadda Somaliland, xogtaas oo ay ku jirto tilmaanta qofka uu la xidhiidho qoraalku, cinwaanka qoraalada ee qofkaas iyo cinaaka xafiiska guud ee qofka leh xafiis guud. Foomka ama xaashida jeldiga ah sinaba ugama reebi karaan in lagu daro qoraal wax kasta oo aan sharciga Jamhuuriyadda Somaliland mamnuucin, mana

waajibin karo in lagu daro qoraal wax aan sharcigan ama sharci kale oo Jamhuuriyadda Somaliland leedahay waajibin ama ogolaan in lagu daro qoraalkaas.
(2) Foomka ama xaashida jeldiga ah waxa laga soo qaadayaa inuu ka yahay qayb qoraalka la diiwaangeliyay ee isticmaalay foomkaas ama xashidaas. Xogta ku jirta foomka ama xaashida ayaa ka mudnaan leh xog kasta oo aan waafaqsanayn oo ku jirta qoraal kale oo lala diiwaangeliyay.
(3) Diiwaan-hayuhu wuu bixin karaa, marka laga soo codsado, foomka iyo xaashida uu diiwaan-hayuhu shardi ka dhigay in loo isticmaalo si waafaqsan qodobkan

## Qodobka 86aad
## Khidmadaha iyo anaaxyada

(1) diiwaan-hayuhu waa inuu saraa kana qaadaa khidmad:
(a) Hawlqabadka iyo diwaangelinta qoraal uu waajibiyay ama ogolaaday sharcigani kaasoo loo soo gudbiyay diiwaan-hayaha
(b) Soo saarista shahaado, taas oo ay ku jirto siinta shahaadada jiritaaka cid diiwaangelisay qoraal oo ay ku jirto shahaadada jiritaanka haboon (certificate of good standing)
(2) Wasiirka Ganacsigu wuxuu soo rogi karaa, ururin karaana dhamaan khidmadaha kale ama ganaaxyada loo soo rogay ama loo qiimeeyey si waafaqsan xeerkan.
(3) Khidmadahaasi iyo ganaaxyadaas waa in hadba Wasiirka Ganacsigu isaga oo ku tilmaamaya xeer-nidaamiye uu ku xadidaa qadar isugayntiisu aanay ka badnayn qiyaastii qarashka si dadban iyo si toos ahba ugu baxay adeega loo bixiyay si waafaqsan xeerkan

## Qodobka 87aad
## Waqtiga iyo taariikhda dhaqangalka qoraalka la diiwaangeliyay

(1) Marka laga reebo sida ku dhigan farqadda (2) ama (4) ee qodobkan, qoraal uu diiwaangeliyay diiwaanhayuhu waa dhaqan gal:

(a) Hadii aan lagu sheegin qoraalka la diiwaangeliyay xilliga dhaqangalka, taariikhda la diiwaangeliyay oo ay cadayn u tahay diwaanka diiwaanhayaha ama

(b) Hadii waqtiga dhaqangalka lagu sheegay qoraalka la diiwaangeliyay, xilliga lagu sheegay qoraalka ee ku dhigan diiwaanada diiwaanhayaha, ama waqtiga qoraalka la diiwaanegliyay uu diiwaangeliyay diiwaanhayuhu yada oo laga tix raacayo diiwaanda diwaanhayaha,

(2) Qoraal la diiwaangeliyay wuxuu sheegi karaa waqtiga iyo taariikhda dhaqangalka oo dib loo dhigay, hadii uu sidaas dhigana qoraalka la diiwaangeliyay wuxuu dhaqangal noqdaa marka danbe ee waqtigaas iyo taariikhdaas ama waqtiga iyo taariikhda qoraalka la diiwaangeliyay laga diiwaangeliyay Diiwaanhayaha ee waqtiga iyo taarikhda ku dhigan diiwaankadiiwanhayaha. Hadii qoraal la diiwaangeliyay sheego taariikhda dib loo dhigay ee dhaqangalka balse aanu sheegin waqti, qoraalka la diiwaangeliyay wuxuu dhaqangal noqonayaa wixii ka danbeeye 11:59 duhurnimo taariikhda ku dhigan qoraalka ama waqtiga iyo taariikhda qoraalka la diiwaangeliyay laga diiwaanegliyay Diiwaanhayaha yadoo laga tixraacayo diiwaanada diiwaanhayaha. Hadii qoraalka la diiwaangeliyay sheego taariikhda dhaqangalka ee dib loo dhigay oo ka danbaysa maalinta sagaashanaad kadib taarikhda la diiwaangeliyay qoraalka, qoraalka la diiwaangeliyay wuxuu dhaqnagal noqonayaa 11:59 duhyrnimo ee maalinta sagaashanaad laga soo bilaabo taariikhdii la diiwaangeliyay. Qoraal la diiwaangeliyay wuxuu sheegi karaa hanaanka (order) arimaha lagu sheegay qoraalka la diiwaangeliyay laga soo qaadayo inay u dhaceen. Farqadan (2) waxa xadidi kara (limited) qodobo kale oo ka mid ah xeerkan. Hadii ay is-khilaafaan farqadan (2) iyo qodobkale oo ku jira Xeerkan, qodobka kale ayaa la raacayaa.

(3) Hadii qoraal la diiwaangeliyay uu sheegayo taariikhda dhaqangalka oo dib loo dhigay si waafaqsan farqadda (2)

ee qodobkan, qoraalka la diiwaangeliyay waxa laga joojin karaa inuu noqdo dhaqangal hadii qof uu la xidhiidho qoraalka la diiwaangeliyay uu u soo gudbiyo diiwaan-hayaha, si uu ugu diwaangeliyo si waafaqsan cutukba 14aad ee Xeerkan, taariikhda dhaqangalka ee lagu sheegay qoraalka ama ka hor ama maalinta sagaashanaad kadib taariikhda la diiwaangeliyay qoraalka, qoraal sixid oo dib uu ula noqonayo qoraalka la diiwaangeliyay.

(4) hadii laba qoraal ama in kabadan isla hal mar loo soo gudbiyo diiwaanhayaha, mid kasta oo ka mid ah qoraalada waa in laga soo qaadaa in isla hal mar la diiwaangeliyay hadii mid kastaa tilmaamayo, hadii uu ku qanco diiwanhayuhu, dhamaan qoraalada ay tahay in laga soo qaado in isla hal mar la diiwaangeliyay uuna sheego in dhamaan qoraaladaas laga soo qaado in isla hal mar la diiwaangeliyay. Dhamaan qoraaladaas waxa laga soo qaadayaa in la diiwaangeliyay waqtiga iyo taariikhda diwaangelinta qoraalka u horeeyay la diiwaangeliyay oo ay cadayn u noqonayso waqtiga iyo taariikhda ku qoran diiwaanada diiwaanhayaha. Hadii mid ka mid ah qoraaladaas uu diido diiwaanhayuhu waxa laga soo qaadayaa in la diiday dhamaan qoraalda kale oo dhan.

## Qodobka 88aad
## Dib u qoridda qoraalka la diiwaangeliyay

(1) Hadii aanu sharcigu u sheegin si cad si ka duwan:

a) Shirkadi waxay dib u qori kartaa (restate) qoraalkeeda asaaska ama qoraalka diiwaangelinta shirkad jirta waqti kasta iyada oo ay u soo gudbinayaan Saamilayda ama qof kale oo uu u ogolaaday sharcigu inuu soo gudbiyo, iyaga oo ka wakiil ah shirkada, qoraalka wax kabadalka cusub Diiwaanhayaha si uu ugu diwaangeliyo si waafaqsan cutubka 12aad ee Xeerkan.

b) Dib u qoridda qoraalka waxa ku jiri karaa mid ama in kabadan oo kaabis iyo wax ka bedel

(amendments) u ah qoraalka hadii wax kabadalkaas qoraalka asaaska loo ansixiyey hanaanka ku dhigan sharcigaasi, Wax ka bedelkaasi wuxuu:

I. Tirtiri karaa magacyada iyo cinwanada abaabulayaasha (organizers) ama dadka kale ee aasaasay shirkada ama magaca iyo cinwaanada dadka diiwaangelinaya shirkada.
II. Tirtiri karaa magacyada iyo cinwaanda mid ama dhamaan dadka lagu magacaabay qoraalka inay yihiin dadka keenay qoraalka aasaaska si loo diiwaangeliyo.
III. Tirtiri karaa cinwaaka xafiiska guud ee shirkada

c) Shirkadda wax ka badalay qoraalkeeda aasaasku ama qoraalka diiwaangelinta shirkad jirta waa inay u soo gudbisaa diiwaanhayaha, si uu ugu diwaangeliyo si waafaqsan Cutubka 12aad, wax ka bedel sheegaya:
I. Magac shirkadeedka shirkada
II. Qoraalka dib u qoridda qoraalka

d) Marka laga diiwaangeliyo wax ka bedelka qoraalka Diiwaanhayaha ama taarikhda dhaqangal ee dib loo dhigay ee uu sheegay wax ka bedelku iyada oo la raacayo qodobka 87, qoraalka aasaaska ama qoraalka diiwaangelinta shirkad jirta ee wax laga bedelay ayaa ah ka saxda ah oo ka sareeya nuqulkii hore ee la diiwaangeliyay iyo dhamaan wax ka bedeladii ka horeeyey ee lagu sameeyey nuqulka hore.

## Qodobka 89aad
## Sixidda qoraal la diiwaangeliyay

(1) Qof wuxuu u soo gudbin karaa Diiwaanhayaha si loogu diiwaangeliyo si waafaqsan Cutubka 12aad sixitaan si:

a) Uu u saxo qoraal la diiwaangeliyay hadii

qoraalka la diiwaangeliyay ay ku jirto xog qalad ahayd waqtigii qoraalka loo soo gudbiyay Diiwaanhayaha si uu ugu diwaangeliyo si waafaqsan cutubka 12aad ee Xeerkan.

b) uu dib ugula noqdo (revoked) qoraal la diiwangeliyay si waafaqsan qodobka 88(3)

(2) Qoraalka sixitaanka ahi waa inuu:

(a) Sheegaa magaca shirkadda qoraalku la xidhiidho

(b) Tilmaama qoraalka la diiwaangeliyay si uu ugu qanco diiwaanhayuhu

(c) Sheegaa xogta ku jirta qoraalka la diiwaangeliyay ee la saxayo

(d) Sheegaa sixitaanka

(f) Hadii uu dib ula noqonayo qoraal la diiwaangeliyay si waafaqsan 88(3), sheegaa in qoraalka la diiwaangeliyay lala noqday

(3) Marka laga reebo sida ku dhigan farqadan (3), qoraalka sixitaanka ahi waxa uu dhaqangal noqonayaa taariikhda dhaqangalka qoraalka la diiwaangeliyay u saxay iyada oo la raacyo taariikhda ku taal diwaanada diiwaanhayaha. Qofkii ku tiirsan qoraalka la diiwangeliyay ee aan saxnayn uuna si taban u saameeyey sixitaanku, qoraalka sixitaanku wuxuu dhaqangelayaa marka la diiwaangeliyay. Qoraalka sixitaanka ee ku dhigan taariikhda dhaqangalka qoraal la diiwaangeliyay taariikh hore wuxuu dhaqangal noqonayaa taariikhdaas hore ama taariikhda qoraalka la diiwaangeliyay laga diiwaangeliyay diwaanda Diiwaanhayaha iyada oo loo eegayo taariikhda ku qoran diiwaanada Diiwaanhayaha mid kastaa ha danbeeyee. Qoraalka sixitaanku qasab maaha inuu sheego taariikhda dhaqangalka oo dib loo dhigay si ay u dhaqangasho qoraalka sixitaaka laftiigiisu.

## Qodobka 90aad.
## Qoraal wax ka bedel ah (Statement of change)

(1) Qof wuu kaabi karaa (amend), baabiin karaa (cancel) ama dib buu ula noqon kara (revoke) ama si kale u bedeli karaa qoraal la diiwaangeliyay hadii ay dhacaan duruufo

kadib marka laga diwaangeliyo qoraalka Diiwaanhayaha kuwaas oo ka dhigaya daruuri in qoraalka la diiwaangeliayay la bedelo

(2) Qoraalka la diiwaangeliyay wuxuu noqonayaa mid la bedelay marka loo gudbiyo diiwaanhayahu, si uu ugu diwaangeliyo si waafaqsan cutubka 12aad, qoraalka wax ka bedelista

(a) Sheegaya magac shirkadeedka shirkada qoraalku la xidhiidho;

(b) Tilmaamaya qoraalka la diiwaangeliyay iyada oo la raacayo hanaanka uu ku tilmaamo Wasiirka Ganacsigu xeer-nidaamiye

(c) Sheegaya xogta ku jirta qoraalka la diiwaangeliyay ee la bedelayo

(d) Sheegaya mid kasta oo ka mid ah bedelaadda la sameeyey

(e) Sheegaya xog kasta oo lagu daray ama laga tirtiray, hadii ay jirto

(f) Waafaqaya dhamaan shuruudaha ku dhigan Xeekran ee ku saabsan qoraalka wax ka bedelka

(3) hadii qof uu si gaar ah ugu ogolaaday ama ku waajibiyay sharci aan ahayn xeerkan inuu wax ka bedelo (amend), baabiiyo (cancel) ama dib ula noqdo ama si uun kale u bedelo qoraal la diiwaangeliyay, waxuu uga bedeli karaa, baabiin karaa, dib ula noqon karaa, ama si uun kale u bedeli karaa qoraalkaas la diwaangeliyay keliya si waafaqsan sharcigaas hadii aan sharcigaas ama sharic kale oo aan ahayn Xeerkani uu sidoo kale ogolaado wax ka bedelka, baabiinta, dib ula noqoshada, ama wax ka bedel kasta oo kale in lagu sameeyo qoraalka wax ka bedelka si waafaqsan qodobkan.

(4) Qoraalka wax ka bedelka ah iyo qoraalka uu saameeyo wax ka bedelkuba waxay u dhaqangelayaan si waafaqsan qodobka 87

## Qodobka 91aad

## Badalidda cinwaanka xafiiska guud

(1) Shirkadi waxay ku badali karta cinwaanka xafiiskeeda guud kaliya ina ay kusheegto cinwaanka kahore ka gadisan mid ka mid ah qoraaladan,

a) Qoraalka wax badalka ee loo diiwaan galiyey si waafaqsan qodoka90 taas oo ay tahay inuu waafaqsan Xeerkan.
b) Warbixin sanadeedka loo diiwaan galiyey si waafaqsan qodobka 72
c) Foomka ama waraaqaha kale ee uu diiwaan galiyey diiwaan hayuhu si waafaqsan cutubka12aad ee xeerkan, ee diiwaan hayuhu tilmaamay isga oo soo saaraya xeer nidaamiye in lagu qoro isbedelkaas ama
d) Qoraalka kala diridda

**Qodobka 92aad**
**Waajibka Diiwaanhayaha ee diiwaangelinta iyo hanaanka diiwaangelinta**

(1) Hadii qoraal loogu soo gudbiyo Diiwaanhayaha habka ku dhigan cutubka 12aad ee Xeerkan uu waafaqo qodobka 83 loona bixiyay dhamaan khidmadaha waajibay hanaanka uu ku tilmaamo Wasiirku xeer-nidaamiye, diiwaanhayuhu waa inuu diiwaangeliyaa. Diiwaan hayuhu waajib kama saarna inuu ka go'aan gaadho in qoraalku waafaqsan yahay qayb ama dhaaman shuruudo uu dhigay xeer.

(2) Diiwaan hayuhu wuxuu ku diiwaanlgeliyaa qoraal isaga oo calaamadinaya ama si uun kale ugu qoraya ereyga "diiwaanhayaha" iyo waqtiga iyo taariikhda diwaangelinta qoraalka dushiisa ama ku ladhaya, marka uu yahay qoraalka aasaaska ama qoraalka diiwaangelinta shirkad jirta wuxuu ku darayaa si waafaqsan hanaan Wasiirka Ganacsigu ku tilmaamo xeer-nidaamiye lambar tilmaame ah (indentification number) oo u gaar ah ganacsigaas, marka uu yahay qoraal mar danbe loo gudbiyay si loo diiwaangeliyo oo la xidhiidha shirkad la sameeyey ama la diiwaangeliyay, lambarkaas tilmaame ee qoraalka aasaasku waa in lagu daro dhamaan qoraalada la xidhiidha ee la diiwaangelinayo. Diwaanada qoraalada soo gala Diiwaanhayaha si uu u hayo waa inay noqdaan hab qoraalka la diiwaangeliyay uu ula soo bixi karo diiwaan

hayuhu qaab la fahmi karo iyada oo ay la socoto waqtiga iyo taarikhda la diiwaangeliyaay.

(3) Hadii diiwaan hayuhu ogolaado in qoraal loogu keeno gacanta oo uu diido diiwaan hayuhu inuu diiwaangeliyo qoraalkaas, diiwaanhayuhu waa inuu u celiyaa qofkii u keenay qoraalka oo ay lasocoto faah-faahin kooban oo ah sababta loo diiday in la diiwaangeliyo mudo sodon malamood gudohod ah laga bilaabo maalintii loo soo gudbiyay Diiwaanhayaha inuu diiwaangeliyo.
(4) Waajibka Diiwaanhayaha ee diiwaangelinta qoraaladu si waafaqsan Xeerkan waa heer wasaaradeed (ministerial). Diwaangelinta ama diidmada diiwaangelinta qoraalku:

a) Ma saamaysnayso ansaxnimada iyo burintaanka qoraalka qayb ahaan ama guud ahaan;
b) LamaXidhiidho saxnaanshaha ama qaladka xog ku jirta qoraalka;
c) Ma abuuri karto in laga soo qaado (presumption) in qoraalku yahay ansax ama mid buray ama in xog ku jirta qoraalku ay tahay sax ama qalad

(5) (a) Iyada oo aan waxba loo dhimayn farqadda hore ama xeer kale, diiwaanhayuhu, marka uu ka helo codsi qoraal ah oo muujinaya sabab macquul ah oo uu qoray qof awood u leh oo ay taageerayso ansaxinta (validating), sixidda (verifying) iyo hubinta qoraalda hadii Diiwaanhayaha ay la noqoto isaga oo raacaya xeer-nidaamiye uu soo saaray, wuxuu ka saari karaa xog qof tilmaamaysa qoraalada dadku heli karaan (publicly accessabile documents) iyo diiwanada kale ee diiwaanhayuhu ee si waafaqsan qodobkan uu u hayo hadii xogtaas aanu sharcigu waajbin in lagu daro qoraaladaas iyo diwaandaas.

(b) Iyada oo aan waxba loo dhimayn xeer kale, qoraalka ama diiwaanka diiwaanhayuhu ka saaro xogta tilmaamaysa qof si waafaqsan farqadda 5(a) Kama dhigayso mid kala dhiman ama an waxtar lahayn ka saaristaankaasi

(c) diiwaanhayuhu wuxuu hayn karaa nuqulka asalka ah ama mid rogan (copy) qoraal ama diiwaan ay ku jirto

xogta tilmamaysa qof, balse qoraalkaas ama diiwaankaasi waa inuu noqdaa mid u furan in la baadho, nuquladuna ama qoraalada oo daabacan ama diwaanka ama xogta ku jirto qoraalka ama diwaanka waxa diiwaanhayuhu bixin karaa oo keliya marka uu helo codsi qoran oo sabababaysan iyada oo an waxba loo dhimayn xeer

(6) Qodobkan dhexdiisa, "xogta tilmaamaysa qof" waxa loole jeedaa xog ku saabsan qof dabiici ah taas oo loo isticmaali karo in lagu tilmaamo qofkaas, taas oo ay ku jirto.

a) Tilmaame dawladu leedahay ama Lambarka amniga bulsho (A social security number) ama wax u dhigma
b) Lambarka tilmaamaha qof (A personal identification number);
c) Lambar sir ah (A password) ama
d) Ama tiro sir ah (A pass code).

## Qodobka 93aad.
## Ka rafcaan qaadashada diidmada diiwaangelinta qoraal

(1) Hadii diiwaanhayuhu diido inuu diiwaangeliyo qoraal loo keenay si uu u diiwaangeliyo, qofka u keenay Diiwaanhayaha qoraalka wuxuu afartan iyo shan maalmood kadib taariikhda ogaysiiiska diidmadu u dhaqangalayaa si waafaqan qodobka 92(3) wuxuu u rafcaan qaadan karaa Maxkamadda Sare ee Somaliland. Rafcaanku wuxuu bilaabmaya marka loo gudbiyo maxkamadda cabasho lagu codsanayo in lagu qasbo Diiwaanhayaha inuu diiwaangeliyo qoraalka iyada oo lagu lifaaqayo nuqul qoraalka ah iyo nuqul diidmada diiwaanhayaha.

(2) Maxkamdu waxay ku amri kartaa Diiwaanhayaha inuu diiwaangeliyo qoraalka ama inuu qaado talaabooyinka kale ee ay u aragto maxkamadu inay haboon yihiin.

**Qodobka 94aad**

**Raadka cadaymeed ee qoraalka la diiwaangeliyay**

Shahaado ku lifaaqan nuqul qoraal sita saxeexa ama saxeexa oo sawiran (facsimile) ee Diiwaanhayaha iyo shaambad sheegayana in qoraalka laga diiwaangeliyay diwaanada diiwaanhayaha, wuxuu u yahay cadayn (prima facei evidence) in qoraalku ku jiro diwaanada diiwaanhayaha.

[

**Qodobka 95aad**

**Shahaadooyinka uu soo saaryo diiwaanhayuhu**

(1) Diiwaanhayuhu wuxuu u siin karaa qof kasta, marka uu soo codsado, nuqul ka mid ah qoraal uu u diiwaangeliyay diiwaanhayuhu si waafaqsan Xeerkan, shahaado loo soo saaray ama la socota nuqul ka mid ah qoraal kasta oo la diiwaangeliyay oo tilmaamaysa qoraalka la diiwaangeliyay kana marag kacay in nuqulku yahay nuqulka saxda ah ee qoraalka la diiwaangeliyay, iyo hadii ay haboon tahay, shahaadada jirintaanka haboon oo khusaysa shirkad. Diiwaanhayuhu wuxuu siin karaa qof kasta, marka uu soo codsado, shahaado kasta oo ku jirta diwaanka diiwaanhayuhu ee diiwaan hayuhu ula muuqata inay ku haboon tahay

(2) Shahaadada uu soo saaro diiwaanhayaha waxa loo qaadanaya waxa ku jira shahaadadaas inay u tahay cadayn waxa ku qoran (prima facie evidence)

**Qodobka 96ad**

**Keeni waaga ama diidmada in qoraal la diiwaangeliyo**

Qofka ay si taban u saamaysay in qof keeni waayo ama diido inuu u keeno qoraal diiwaan hayuhu si uu ugu diwaangeliyo si waafaqsan cutubka 12aad ee Xeerkan ee arin la xidhiidha shirkad wuxuu u dacwoon kara maxkamadda Gobolka xafiiska guud ee shirakdu ku taal ama hadii aan shirkadu ku lahayn xafiis guud Jamhuuriyadda Somaliland maxkamadda Gobolka Hargeysa, si ay u ansixiso qoraalka una amarto in qofka

ay khuseeysaa uu u gudbiyo qoraalka Diiwaanhayaha si uu ugu diwaangeliyo si waafaqsan cutubka 12aad ee Xeerkan. Hadii maxkamadu go'aansato inay haboon tahay in qoraalka la diiwaangeliyo, uuna jiray keeni waa ama diido in la ansixiyo qoraalka loona gudbiyo diiwaanhayuhu si uu ugu diiwaangeliyo si waafaqsan cutubka 12aad ee Xeerkan, waxay amaraysaa Diiwaanhayaha inuu u diwaangeliyo qoraalka qaabka ay ansixisay maxkamaddu.

## Qodobka 97aad
## Awoodaha

Wasiirka Ganacsigu wuxuu leeyahay dhamaan awoodaha daruurig ah siuu u guto waajibaadka uu saaray Xeerkani oo ay ku jirto inuu soo saaro xeer-nidaamiyeyaal.

## Qodobka 98aad
## Ogaysiisyada Diiwaanhayaha

(1)(a) Diiwaan hayuhu wuxuu gaadhsiin karaa ogaysiis, isaga oo raacaya hanaanka uu ku tilmaamay xeer-nidaamiye wasiirku, kuwaas oo ay ku jirto ogaysiis lagu gudbiyo hanaanka elektorooniga qof kasta arin ka dhashay ama la xidhiidha xeerkan

(b) Farqaddani ma saamaynayso shuruudaha kale ee la xidhiidha ogaysiisyada ee diiwaanhayuhu ay tahay inuu raaco ee ku dhigan xeer kale

(2) Midkoodna go'aanka ah inuu bixiyo ama bixin waayo ogaysiisyada ku dhigan farqadda (1) ee qodobkan ama ku guuldaraysiga inuu helo ogaaysiis la bixiyay, ma saamayn karo waajib ama shardi uu dhigay qodob ka mid ah Xeerkan umana noqon karto cudur daar inaan qof waafiqin waajib ama shardi uu dhigay qodob ka mid ah Xeerkan.

## QAYBTA 4
## CUTUBKA 15
## SHIRKADAHA SHISHEEYE

### Qodobka 99aad.
### Waajibnimada ogolaanshaha in ganacsi la qabto ama hawlo la fuliyo

(1) Shirkadleshiyeeye waa in aanuu ka qaban ganacsi ama aanu ka fulin hawl gudaha jumhuuriyadda soomaliland marka laga reebo inuu waafaqo cutubka13aad iyo ilaa qoraalka ogolaanshaha lagu siiyey shirkada shisheeye lagaliyo diiwaanada diiwaan-hayaha. Hadii xukunada cutubka13aad ay iska hor yimaadaan sharci kale oo soomaliland ka jira marka lagu dabaqayo Shirkad shisheeye, xeerkaas kale ayaa lagu dabaqayaa ee lagu dabiqi mayo cutubka13aad.

(2) Shirkad shisheeye lagasoo qaadi maayo inuu uga qabtay ganacsi ama uga fuliyey hawlo guda jamhuuriyadda soomaliland marka laga eegayo micna farqada (1) ee qodobkan sababta oo ah inuu ka fuliyey gudaha soomaliland mid ama in kabadan oo hawlahan soo socda ah

(a) Inuu ku qabtay shirarka mulkiilayaashiisa ama maareyayaashiisa ama ka fuliyey hawl kale oo la xidhiidha arimihiisa daakhiliga ah

(b) Inuu ka qabtay hawl hal mar ah oo ku dhamaata sodon maalmood gudohood isla, arkaana aan ahayn mid soo noqnoqotay oo isku dabecad ah

(c) Markay tahay Shirkad shisheeye oo aan faaida-doon ahayn inuu bixiyey deeqo.

(3) waxa ku jira qodobkan maxadidi karaan ama ma samayn karaan xaqa in lagu qaado Shirkad shisheeye oo aan haysan ama wajib ku ahayn inuu haysto ogolaansho inuu kaqabto ganacsi ama ka fuliyo hawl gudaha soomaliland, awooda dacwad qaadis e maxkamada jamhuuriyada soomaliland ama in la gaadhsiiyo ayaan shisheeye habraac kasta, ogaysiis, ama dalab uu

ogolaaday ama waajibiyey sharci inla gaadhsiiyo yadoo laraacayo axkaamta sharci ama qodobada shuseeya ee xeerka habka madaniga.

## Qodobka 100aad

## Cawaaqibka ka dhasha ganacsiga ama qabashada hawlo ogolaasho la'aan

(1) (a) Shirkad shisheeye oo ka qabanaya ganacsi ama ka fulinaya hawl gudaha Jamhuuriyadda Somaliland isaga oo aan haysan ogolaansho ama cid isaga ka wakiil ah looma ogolaan karo inuu ka bilaabo dacwad ama ka dacwoodo maxkamad ku taal Jamhuuriyadda Somaliland si uu u soo urursado dayn ama u fuliyo waajibaad ilaa qoraalka ogolaashaha lagu siiyay shirkada shisheeye la geliyo diiwaanada diiwaan-hayaha.

(b) Maxkamadu way joojin kartaa dacwadda uu bilaabay ama dacwoode ka yahay Shirkad shisheeye ilaa ay ka go'aan gaadho in shirkada shisheeye uu leeyahay qoraalka ogalaanshaha lagu siiyay Shirkad shisheeye oo ku jira diiwaanada diiwaan-hayaha. Hadii maxkamadu go'aansato in shirkada shisheeye geliyo qoraalka ogolaansho lagu siiyay Shirkad shisheeye diiwaanada diiwaan-hayaha, maxkamadu way sii wadi kartaa joojinta dacwadda ilaa qoraalka ogalaanshaha lagu siiyay shirkada shisheeye la geliyo diiwaanada diiwaan-hayaha. Hadii shirkada shisheeye uu leeyahay qoraalka ogolaanshaha lagu siiyay shirkada shisheeye oo ku jira diiwaanada diiwaan-hayaha, dacwad ka socota maxkamad ku taal Jamhuuriyadda Somaliland oo uu dhinac ka yahay shirkada shisheeye, kadib taariikhda dhaqangalka qoraalkaas ogolaanshaha lagu siiyay shirkada shisheeye, looma oodi karo ama joojin karo inaan qoraalka ogolaanshaha lagu siiyay shirkada shisheeye aanu ku jirin diiwaanda diiwaan-hayaha.

(2) Shirkad shisheeye oo ka qabto ganacsi ama ka fuliya hawl gudaha Jamhuuriyadda Somaliland isaga oo aan loo ogolaan inuu sidaas sameeyo waxa la saarayaa ganaax loo go'aaminayo loona qaadayo si waafaqsan qodobka 89. Qoraal ogolaanshaha lagu siiyay Shirkad

shisheeye ma gelin karo diiwaanada Diiwaanhayaha shirkadu ama cid metelaysaa shirkada marka shirkada shisheeye uu ka qabtay ganacsi ama ka fuliyay hawl gudaha Somaliland isaga oo aan haysan qoraalka ogolaanshaha Shirkad shisheeye oo ku jira diiwaanada Diiwaanhayaha ilaa qadarka lacagta ku tilmaaman farqadda (2) ee qodobkan la bixiyo.

(3) Qadarka lacagta ah ee ku tilmaaman farqadda (2) ee qodobkan si loo helo waxa Garyaqaanka Guud uu ka furi karaa dacwad maxkamad awood u leh. Marka ay maxkamadu hesho in shirkada shisheeye ama maareeyayaashiisa ama wakiiladiisu iyaga oo ka wakiil ah ay ka qabteen ganacsi ama ka fuliyeen hawl gudaha Jamhuuriyadda Somaliland si ka soo horjeeda cutubka 13aad, maxkamadu waxay soo saari kartaa qaraar ka joojinaya shirkada iyo maareeyayaashiisa iyo wakiiladiisa inay ka qabtaan ganacsi ama ka fuliyaan hawl iyo inay isticmaalaan wax xuquuq ama mudnaan ah gudaha Jamhuuriyadda Somaliland ilaa ay bixiyaan dhamaan qadarka lacagta ah oo dhan iyo qarashka dacwadda iyo ilaa shirkada shisheeye uu waafaqo cutubka 13aad.

(4) iyada oo aan waxba loo dhimayn farqadda (1) ee qodobkan, macaamilka ganacsi ama hawlaha uu ka samayay gudaha Somaliland Shirkad shisheeye isaga oo aan gelin qoraalkiisa ogolaanshaha Shirkad shisheeye diiwaanada Diiwaanhayaha waxba yeeli mayso ansaxnimada ficilada shirkada shisheeye kamana joojinayso inuu iska difaaco dacwad lagaga soo oogay gudaha Somaliland.

## Qodobka 101aad
## Qoraalka ogolaansho siinta Shirkad shisheeye inuu qabto ganacsi ama fuliyo hawlo

(1) shirkada shisheeye waxa uu u keeni karaa diiwaan-hayaha, si uu u diiwaangeliyo si waafaqsan cutubka 13aad ee xeerkan, qoraalka ogolaanshaha lagu siiyay Shirkad shisheeye oo sheegay:

(a) magac saxda ah iyo magaca ay qaadatay, hadii

midkood looga baahan yahay sida ku cad cutubka 3aad ee xeerkan

(b) dalka lagu aasaasay

(c) qaabka shirkada oo ah qaabka looga aqoonsan yahay sharciga dalka lagu aasaasay shirkada

(d) Cinwaankeeda guud, iyo

(e) Taariikhda uu ka bilaabayo ama la filayo inuu ka bilabo ganacsiga ama ka fuliyo hawlo Somaliland

**Qodobka 102aad.**
**Wax ka bedelidda qoraalka ogolaanshaha lagu siiyay Shirkad shisheeye inuu qabto ganacsi ama fuliyo hawlo**

Hadii duruuftu is bedesho taas oo ka dhigay qoraal ku jira qoraalka la diiwaangeliyay ee ogolaanshaha lagu siiyay Shirkad shisheeye wax aan run ahayn, shirkada shisheeye ee loo ogolaaday inuu ganacsi ka qabto ama ka fuliyo hawlo Somaliland waa inuu u keenaa diiwaanhayaha, si uu ugu diiwaangeliyo si waafaqsan cutubka 12aad ee Xeerkan, qoraal ku haboon oo wax ka bedel ah kaas oo dhigaya in dhamaan qoraalada shirkada shisheeye ee ogolaanshaha haystaa ay yihiin dhamaantood run.

**Qodobka103aad.**
**Saamaynta qoraalka ogolaansho siinta Shirkad shisheeye**

(1) Shirkad shisheeye wuxuu ogolaansho u haysta inuu ka qabto ganacsi ama ka fuliyo hawlo gudaha Somaliland laga bilaabo taariikhda dhaqan galka shirkada shisheeye ogolaanshaha lagu siiyey ilaa taariikhda dhaqan galka qoraalka shirkada dib loola noqdo.

(2) Shirkad shisheeye ee u haysta ogolaansho inuu ka qabto ganacsi ama ka fuliyo hawlo gudaha soomaliland waxa u leeyahay xuquuqo iyo mudnaano lamid ah, balse malaha kuwo ka badan, marka laga reebo hadii sidaasi si kaduwan xerkani sheegin, waxaana saran waajibaadyo, xanibaadyo, ganaaxyo iyo masuuliyado lamid ah Shirkadaha wadaniga ah.

(3) Waxa kujira cutubkan15aad, uma ogolaanayaan jamhuuriyadda soomaliland inay nidaamiso dhismaha, asaaska, kaladirida, jiritaanka, ama hawlaha gudaha ee Shirkad shisheeye oo ogolaansho u haysta inuu a qabto ganacsi ama ka fuliyo hawlo gudaha soomaliland.
(4) Shirkad kasta oo ka qabanaya ganacsi ama a fulinaya hawlo gudaha soomaliland sharciga dalka lagu asaasay Shirkad shisheeye ayaa nidaminaya dhismaha iyo arimaha gudaha ee shirkada shisheeye iyo masuuliyadka mulkiilayaashiisha iyo maareyayaashiisa.

## Qodobka 104aad.
## La noqoshada Shirkad shisheeye (Withdrawal of foreign entity).

(1) Shirkad shisheeye oo ogolaansho u haysta inuu ka qabto ganacsi ama ka fuliyo hawl gudaha Somaliland wuu ka tanaasuli kartaa ogolaanshahaas iyada oo uu u gudbinayo diiwaanhayaha, sii uu ugu diiwaangeliyo si waafaqsan cutubka 12aad ee xeerkan, qoraalka shirkada shisheeye ee dib ula noqoshada oo sheegay:

a) Magaca saxda ah iyo magaca ay qaadatay, hadii uu jiro;
b) Cinwaanka waraaqaha ee wax loogu diri karo si waafqsan qodobka 107
c) Cinwaanka xafiiska guud
d) Dalka lagu aasaasay
e) Inaanu wax ganacsi ah ama hawl ah ka qabanayn gudaha Jamhuuriyadda Somaliland iyo inuu ka tanaasulay ogolaanshihii uu u haystay inu ka qabto ganacsi ama ka qabto hawlo gudaha Jamhuuriyadda Somaliland
f) In magaciisa ganacsi ee ku jira diiwaanada Diiwaanhayaha ee waafaqsan sharciga khuseeya, magaca ay qaadatay, hadii uu jiro, uu la noqday laga bilaabo taariikhda dhaqangalka qoraalka dib ula noqoshada ee shirkada shisheeye

(2) hadii shirkada shisheeye qoraalka dib u la noqoshada shirkada shiheeye u keeno Diiwaanhayaha si uu ugu

diiwaangeliyo si waafaqsan cutubka 12 ee xeerkan ka hor taariikhda warbixin sanadeedka shirkada shisheeye keeni lahaa si waafaqsan cutubka 10aad ee xeerkan, shirkada shisheeye waxa laga deynayaa waajibka ku saarnaa inuu keeno war-bixin sanadeedka iyo khidmadii la socotay.

**Qodobka 105aad**
**Gaadhsiinta Shirkad shisheeye oo dib u noqday**

(1) Hadii Shirkad shisheeye oo qoraalka dib u la noqshada shirkada shisheeye loo diiwaangeliyay si waafaqsan qodobka 103 aan lagu gaadhsiin karin habraac kasta oo sharci, ogaysiis ama dalab gudaha Jamhuuriyadda Somaliland taas oo la xidhiidha dacwad ka dhalatay mudadii uu ogolaanshaha u haystay inuu ka qabto ganacsi ama ka fuliyo hawl gudaha Somaliland, shirkada shisheeye waxa lagu gaadhsiin karaa habka waraaq diridda (mail) oo ay ku jirto waraaq-dirid la diiwaangeliyay lana tasdiiqiyay (registered and certified mail) oo lagu socod siiyay cinwaanka xafiiska guud ee shirkada.Gaadhsiintu waxay tahay mid buuxda farqadan dhexdeeda marka u horaysa ee:-

a) Taariikhdashirkada shisheee helay habraaca sharci, ogaysiiska ama dalabka
b) Shan maalmood kadib marka waraaqda la diro
c) Taariikhda ku qoran waraaqda helintaanka ee dib loo soo celiyay (return receipt), hadii uu saxeexay shirkada shisheeye.

(2) Farqadda (1) ee qodobkani matali mayso habka keliya ama habka waajibka ah ee wax lagu gaadhsiinayo Shirkad shisheeye oo diiwaangeliyay qoraalkiisa dib ula noqoshada shirkada shisheeye.

**Qodobka 106aad**
**Ku dabiqidda shirkado shisheeye**

Qoraalka la diiwaangeliayay ee Shirkad jira ee shisheeye loogu ogolaaday inuu ka qabto ganacsi ama ka fuliyo hawlo gudaha Somaliland waxa laga soo qaadayaa

cutubka 13aad dhexdiisa inuu yahay qoraalka ogalaansho siinta Shirkad shisheeye.

## CUTUBKA 16
## QODOBO KALA DUWAN IYO QODOBADA KALA GUURKA

### Qodobka 107aad
### Shirkadaha jira

Shirkad kasta oo jirta waxa maamulaya oo qabanaya xeerkan, haseyeeshee taasi waxba u dhimi mayso xuquuq ama waajibaad jira oo la xidhiidha shirkad jirta iyo dacwad ka dhan ah shirkad jirta ama mid ka mid ah Saamilayda ama maareeyayaasheeda islamarkaana xuquuqahaas, waajibaadkaas iyo dacwadaas waxay ahaanayaan dhaqangal si waafaqsan xeerka.

### Qodobka 108aad
### Diiwaangeelinta iyo ganaax

(1) shirkad kasta oo jirtaa waa inay si waafaqsan xeerkan isu diiwaangelisaa 30 (sodon) maalmood gudohood kadib taariikhda dhaqangalka xeerkan iyada oo u keenaysa Diiwaanhayaha qoraal diiwaangelin shirkad jirta si uu ugu diiwaangeliyo si waafaqsan cutubka 12aad ee xeerkan

(2) shirkad kasta oo jirta oo ku guuldaraysata ama diida inay ugu keento waqtiga ku xadidan farqadda hore ee qodokan ama ka hor Diiwaanhayaha qoraalka diiwaangelinta shirkad jirta si uu u diiwaangeliyo bixin waydana khidmadda waxa la saarayaa ciqaab loo go'aaminayo loona qaadayo si waafaqsan qodobka 89aad.

### Qodobka 109aad.
### Qoraalka diiwaangelinta shirkad jirta

(1) qoraalka diiwaangelinta shirkad jirta waa inuu sheegaa:

(a) magaca shirkadeedka shirkad jirta oo ay tahay inuu waafaqo cutubka 3aad ee xeerkan, haseyeeshee hadii qoraalka diiwaangelinta shirkadda jirta loogu soo gudbiyo 30 (sodon)

maalmood gudohood kadib taariikhda dhaqangalka xeerkan Diiwaanhayaha si uu u diiwaangeliyo, magac shirkadeedka shirkada jirta loogama baahna inuu waafaqo farqadda (2) ee qodobka 18aad ee cutubka 3aad ee xeerkan

(b) Cinwaanka xafiiska guud ee shirkadda jirta xafiiskeeda guud

(c) Magaca saxda ah iyo cinwaanka waraaqaha loogu diro qof kasta oo diiwaangelinaya shirkadda

(d) In maamulka shirkadda jirtaa uu gacanta ugu jiro mid ama in kabadan oo maareeyayaal ah ama inuu gacanta ugu jiro xubnaha, hadba kay tahay

(e) In ugu yaraan uu jiro hal Saamile oo ay leedahay shirkadda jirtaa

(f) Hawsha ama hawlaha ay qabato shirkadda jirta iyada oo u isticmaalaysa fure ama furayaal istilmaame (self-classification code or codes) hanaanka uu ku tilmaamay Wasiirka Ganacsigu xeer-nidaamiye

(g) arinkii kasta ee kale ee la xidhiidha shirkadda jirta ama qoralka diiwaangelinta shirkad jirta ee qofka ama dadka diiwaangelinaya shirkadda jirta ay la noqoto inay ku daraan

(2) qoraalka diwaangelinta shirkad jirta ma dhigi karo taariikhda dhaqangalka oo dib loo dhigay

## Qodobka 110aad.

## Saamaynta diiwaan galinta qoraalka diiwaan galinta shirkad jirta

Shirkad jirta waxa noqonaysaa mid la diiwaangeliyay marka qoraalkeeda diiwaangelinta shirkad jirta uu noqdo mid dhaqan gal ah, waxayna sidaas ku noqonaysaa shirkadda jirtaa shirkad jiritaan haboon leh

## Qodobka 111aad.

## Ogaanshaha jiritaanka shirkad jirta

Xaqiiqda ah in qoraalka diiwaangelinta shirkad jirtaa uu ku jiro diiwaanada diiwaanhayuhu waxay u tahay

ogaansho in shirkaddu tahay shirkad jirta oo uu maamulayo qabanayana xeerkan iyo dhamaan xaqaa'iqaha kale ee ku jira qoraalka diiwaangelinta shirkad jirta ee uu waajibiyay qodobadda xeerkani.

**Qodobka 112aad.**

**Wax-ka-bedelka qoraalka diwaangelinta shirkad jirta**

(1) iyada oo qoraalka diiwaangelinta shirkad jirta wax looga bedeli karo waqtigii la doono ujeedo kasta, hadana waa in wax laga bedelaa marka:

(a) uu is bedel ku yimaado magaca shirkadda ee shirkadda jirta

(b) ay ku jirto hadal been ah ama qalad ah qoraalka diiwaangelinta shirkad jirta

(2) wax ka bedelka qoraalka diiwaangelinta shirkad jirtaa waa waxba kama jiraan hadii aanay ansixin dhamaan saamilayda ama habkii kale ama aan loo ansixin hanaankii kale ee uu dhigayo xeer-hoosaadku

(3) shirkad jirtaa waxay wax uga bedelaysaa qoraalkeeda diiwaangelinta shirkad jirta iyada oo u soo gudbinaysa qoraalka wax ka bedelka qoraalka diiwaangelinta shirkad jirta Diiwaanhayaha si uu ugu diiwaangeliyo si waafaqsan Cutubka 12aad ee xeerkan, qoraalkas oo sheegaya:

(a) magac shirkadeedka shirkadda jirta

(b) wax ka bedelka qoraalka diiwaangelinta shirkad jirta

**Qodobka 113aad.**

**Shirkadaha shisheeye ee jira**

Shirkad kasta oo shisheeye ee jira waxa maamulaya oo uu hoos imanayaa xeerkan, haseyeeshee taasi waxba u dhimi mayso xuquuq ama waajibaad jira oo la xidhiidha Shirkad shisheeye oo jira iyo dacwad ka dhan ah Shirkad shisheeye oo jira ama mid ka mid ah saamilaydiisa ama maareeyayaashiisa islamarkaana xuquuqahaas, waajibaadkaas iyo dacwadaas waxay ahaanayaan dhaqangal si waafaqsan xeerkan.

## Qodobka 114aad
## Diiwaangelinta iyo Ganaaxa

(1) Shirkad kasta oo shisheeye oo jiraa waa inuu isu diiwaangeliyaa sodon (30) maalmood gudohood kadib taariikhda dhaqangalka xeerkan si waafaqsan xeerkan isaga oo u keenaya Diiwaanhayaha qoraalka ogolaanshaha lagu siiyay shirkada shisheeye ee jira si loogu diiwaangeliyo si waafaqsan cutubka 12aad ee xeerkan,

(2) Shirkad kasta oo shisheeye oo jira ee ku guuldaraysta ama diida inuu u keeno Diiwaanhayaha qoraalka ogolaanshaha lagu siiyay Shirkadaas shisheeye ee jira si loo diiwaangeliyo ka hor ama taariikhda lagu tilmaamay qodobkan, bixin waayana khidmadda u taala waxa la saarayaa ganaax loo go'aaminayo loona ururinayona si waafaqsan qodobka 86.

## Qodobka 115aad.
## Qoraalka ogolaanshaha lagu siiyay Shirkad shisheeye oo jirta

(1) qoraalka ogolaanshaha lagu siiyay Shirkad shisheeye oo jirta waa inuu dhigaa:

(a) magaca shirkada shisheeye ee jira kaas oo ay tahay inuu waafaqo cutubka 3aad ee xeerkan, hadii qoraalka ogolaanshaha lagu siiyaya shirkada shisheeye ee jira loo gudbiyo Diiwaanhayaha si uu u diiwaangeliyo sodon (30) maalmood gudohood kadib taariikhda dhaqangalka xeerkan, magaca shisheeye ee shirkada shisheeye ee jiraa loogama baahna inuu waafaqo farqadda (2) ee qodobka 14 ee cutubka 3aad

(b) cinwaaka xafiiska guud ee shirkada shisheeye ee jira

(c) Magaca saxda ah iyo cinwaanka waraaqaha ee mid kasta oo ka mid ah dadka u soo gudbinaya qoraalka ogolaanshaha lagu siiyay shirkada shisheeye ee jira Diiwaanhayaha si uu u diiwaangeliyo

(d) Hawshas ama hawlaha uu qabtay shirkada shisheeye ee jiraa isaga oo u isticmaalaya fure ama furayaal istilmaame (self-classification code or codes) hanaanka uu ku tilmaamay Wasiirka Ganacsigu xeer-

nidaamiye

(e) Arinkii kale ee la xidhiidha shirkada shisheeye ee jira ama qoraalka ogolaanshaha lagu siiyay shirkada shisheeye ee uu go'aansado inuu ku daro qofka u soo gudbinaya qoraalka ogolaanshaha lagu siiyay shirkada shisheeye ee jira Diiwaanhayaha si uu diwaangeliyo

(2) qoraalka ogolaanshaha lagu siiyay Shirkad shisheeye oo jiraa ma sheegi karo taariikhda dhaqangalka oo dib loo dhigay

**Qodobka 116[aad]**

**Saamaynta diiwaan galinta qoraalka ogolaanshaha lagu siiyey Shirkad shisheeye oo jirta**

Shirkad shisheeye oo jirtaa waxay noqonaysaa mid la diiwaangeliyay marka qoraalka ogolaanshaha lagu siiyay shirkada shisheeye ee jira uu noqdo mid dhaqangal ah wuxuuna sidaas ku noqonaya shirkada shisheeye ee jiraa mid leh jiritaan haboon

**Qodobka117[aad.]**

**Ogaanshaha jiritaanka Shirkad shisheeye oo jira**

Xaqiiqda ah in qoraalka ogolaanshaha lagu siiyay Shirkad shisheeye oo jirta uu ku jiro diwaanada Diiwaanhayaha waxay ogaal u tahay in shirkada shisheeye ee jiraa uu yahay Shirkad shisheeye oo jira oo uu maamulayo oo hoos imanaya xeerkan, waxay sidoo kale u tahay ogaal dhamaan xaqaa'iqa kale ee ku jira diiwanada ee uu shardi ka dhigay in lagu dhigo qoraalka ogolaanshasha lagu siiyay shirkada shisheeye ee ku jira Xeerkan.

**Qodobka118[aad]**

**Wax ka bedelka qoraalka ogolaanshahalagu siiyay Shirkad shisheeye oo jira**

(1) Qoraalka ogolaanshaha lagu siiyay Shirkad shisheeye oo jira waxba looga bedeli karra waqti kasta ujeedo kasta, waana in wax laga bedelaa marka:

a) Is-bedel ku yimaado magaca shirkada shisheeye

ee jira

b) Uu ku jiro qoraal been ah ama qalad ah qoraalka ogolaaanshaha lagu siiyay shirkada shisheeye ee jira

(2) Shirkad shisheeye oo jira waxa uu wax ka bedel ku sameeyaa qoraalkiisa ogolaanshaha lagu siiyay iyada oo uu u keenayo qoraalka wax ka bedelka qoraalka ogolaanshaha lagu siiyay shirkada shisheeye ee jira Diiwaanhayaha si uu ugu diwaangeliyo si waafaqsan cutubka 12, wax ka bedelkaas oo sheegaya:

(a) magaca shirkada shisheeye ee jira

(b) wax ka bedelka qoraalka ogalaanshaha lagu siiyay shirkada shisheeye ee jira

## Qodobka 119aad
## Xeer-nidaamiye Wasiir

(1) Diiwaanhayuhu wuxuu, u gelinayaa shirkad jirta ama Shirkad shisheeye oo jira diiwanada Diiwaanhayaha hanaan uu Wasiirku ku tilmaamo xeer-nidaamiye.

(2) Xeer-nidaamiyahaas wasiir, hadii uu jiro, ugama cudurdaari karo shirkad jirta ama Shirkad shisheeye oo jira waajibka ka saaran inay isu-diiwaangeliso si waafaqsan qodobada Xeerkan, hadba kay tahay, kamana fududayn karo shirkadaas jirta ama shirkadaasshisheeye ee jira cawaaqibka ka dhasha ku guuldaraysiga is-diiwaangelinta

## Qodobka 120aad
## Awoodda Wax Ka Bedelka Iyo Laalista

Baarlamaanku wuxuu awood u leeyahay inuu wax ka bedelo ama laalo dhamaan ama qayb ka mid ah Xeerkan mar kasta oo ay haboonaato, dhamaan Shirkadaha waxa Maamulaya wax ka bedelkaas ama laalistaas.

## Qodobka 121aad
## Laalista

Waxa halkan lagu laalay Xeerka Shirkadaha 2004 (Company Law 2004), iyo Dhamaan Xeerarka kale ee Shirkadeed ee Somaliland leedahay.

## Qodobka 122aad
## Dhaqangalka

Xeerkani wuxuu dhaqangalayaaa, kadib marka ay ansixiyaan labada gole ee sharci dejinta, madaxweynuhuna saxeexo, laguna soo saaro faafinta Rasmiga ah.

| | |
|---|---|
| **C/risaaq Siciid Ayaanle** | **Baashe Maxamed Faarax** |
| **Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL** | **Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL** |